118

AKADEMIYAHA DHAQANKA

# DABKUU SHIDAY DARWIISHKII

‹DARAAMA›



WAXAA DEJIYEY:- "Axmed F. Cali 'Idaajaa, iyo Cabduqadir Xirsi 'Yamyam,"

Muqdisho 1975

F.A.

*AKADEMIYAHA DHAQANKA*

# DABKUU SHIDAY DARWIISHKII

## (DARAAMA)

*WAXAA DEJIYEY*

AXMED F. CALI "Idaajaa" & CABDULQAADIR XIRSI "Yamyam"

*Muqdisho, 1974*

# ARARTA XOGHAYAHA

Dad badan ayaa laga yaabaa inay amankaag ku noqoto kolkii ay arkaan dedaalka laga geystey wixii Sayid Maxamad ku saabsan, intii waayadaan ah. Hadda ka hor waxaa lagu guuleystey in la soo saaro diiwaan lagu ururiyey gabayadii Sayid Maxamad oo ah cayntiisa midkii ugu horreeyey oo dalkeenna ka soo baxa. Taallada weyn ee loo dhisay, haddana hawsheedii socoto ma aha wax la moog yahay. Intaasna waxaa ku xigey riwaayaddaan buuggeedu idin hor yaal. Waxaa, haddaba, lays oran karaa: Muxuu ina Cabdille Xasan waxaas oo maamuus ah ku mutaystay ? Maxaase looga jeedaa ?

Sayid Maxamad taariikhdeenna meel wacan ayuu ka galay, wixii uu inoo tarayna waa laga dheregsan yahay, in kastoo aan sidii ku habboonaan lahayd weli loo soo ban bixin. Halkanise ma aha halkii aan si kooban ama si tifaftiran toona ugaga sheekayn lahaa wixii uu Sayidku ahaa ama Siyaalihii uu u fekari jirey. Taas waxaan u deynayaa ragga taariikhda qora iyo buugagga ay ka soo saari doonaan. Waxanse rabaa inaan iraahdo oo keliya: Sayid Maxamad wuxuu lahaa falsafad gaar ah oo geyeysiisay inuu si muuqata uga soo dhex baxo kumanyaal Soomaali ah oo ay isku xilli noolaayeen, isku habna ku soo koreen. La - dagaallanka gumeysiga iyo dadkii ia dhanka ahaa ka sokow, Sayidku waa ruux mudan in laga dejiyo buugag badan oo ku saabsan falsafaddiisii, murtidiisii iyo suugaantii aan soohdinta lahayn ee uu ummaddiisa dhaxalka ugu reebay.

Haddaan u soo dhaco riwaayaddan akhristaha hor taal, waxay iila eg tahay inaan durbaba carrabka ku dhufto inay tahay riwaayad jaadkeeda ah tii ugu horreeysey intaannu

*og nahay. Waa riwaayad si gaar ah u muujinaysa halgankii Daraawiishta iyo himilooyinkii hoggaamiyahooda; Sayid Maxamad Cabdille Xasan. Ma aha mid aad qosol iyo maad ka filan karto, sida dad badan maskaxdooda ku soo dhacda kolkii ay magac riwaayadeed maqlaan. Waa mid tilmaamaysa noloshii adkayd ee ay ku noolaan jireen urur Soomaaliyeed oo mabda' cad lahaa, goor iyo ayaanna u taagnaa meelmarinta mabda'oodaas ay maanka ku hayeen.*

*Danta aannu riwaayaddan ka leennahay, iyada oo aan mid iyo labo lagu soo koobi karin, waxaa noogu weyn:*

1. *Waa mare inaannu qoreyaasha riwaayadaheenna tusno jid cusub oo ku saabsan soo bandhigidda riwaayadaha taariikhda loogaga sheekeeyo.*

   *Waxaannu rabnaa inaannu Fannaaniinteenna dareensiinno inay jiraan siyaalo ka duwan habkii hore ee riwaayadaha aan ku soo wadney tan iyo waagii aynu bilawnay; sanooyinkii kontonaadkii horraankoodii. Habkaas oo aannu ku doodi karayno inaan laga leexleexan, haddii aannu ku reebno riwaayaddii la oran jirey «Shabeel-naagood» oo uu qoray Jaalle Xasan Sheekh Muumin oo hab cusub ku dhisnayd. ahna Xasan Sheekh Muumin oo hab cusub ku dhisnayd, ahna mid ammaan mudan. Jaallayaal, riwaayaduhu waxay tilmaan ka bixiyaan nolosha aadanaha, adduunkana qosol, Jacayl iyo maad laguma wada haysto.*
2. *Waa marka labaade dantayadu waxay tahay inaannu si xiiso leh oo la macaansan karo u muujinno taariikhdii dheerayd ee ay Sayidka iyo Daraawiishi soo maareen dabadeedna dad badan oo fanka jecel, asii aan akhriska samir u lahayni, ka bartaan dhibtii wixii ay Daraawiishi*



*ahayd iyo arrimihii la soo gudboonaaday kuwii ugu waaweynaa.*

*Labadaas waxyaalood iyo kuwo kale oo aannu ku fakarayneyba waxaan rajaynaynaa inay noqdaan kuwo aan ku guuleysanno.. Ugu dambaystii riwaayaddan oo ah mid aj Soomaali lagu qoro tii ugu horreysey waxay suuragelinaysaa in qoladii doontaa, meel kasta oo ay joogaanba ay dadka tusaan, iyagoo wixii ay u baahdaan oo tusaale iyo farsamaba ah buugga ka dhex heli doona.*

(Dr. Maxamad Aadan Sheekh)
Xaghayaha W. Hiddaha iyo Tacliinta Sare
Muqdisho, Okt. 1974

## ARARTA QOREYAASHA

Qorista taariikhdu, sida laysku raacsan yahay, waa hawl adag oo u baahan feejignaan iyo run-raadis aan eexo iyo qof jeclaysi toona lahayn. Taas macnaheedu ma aha in qofka taariikhdiisa la qorayo xumihiisa la doondoono oo wanaag kasta oo uu lahaa wax uu ku xumaa la garab dhigo, sida dadka qaarkiis door bido.

Qof kasta oo ina aadane ah, waxaa la og yahay inuu gefaf ku dhaco inta uu nool yahay, madax dad ha u noqdo ama yuusan u noqone. Ha yeeshee gefafkaasi waxay aad u muuqdaan kolka uu qofku taariikhda galo oo uu cadow badan yeesho, dadkiisa ha ahaadeen ama shisheeye ha ahaadeen. Markaas baa tillaabo kasta oo gef ah oo xaggiisa ka timaadda la buunbuuniyaa, buur iyo qarna laga dhigaa iyada oo aan taariikhda loo danaynayne wax gaar ah looga jeedo.

Sayid Maxamed Cabdille Xasan sida dhabta ah waa nin mutaysi ku galay taariikhda dalkiisa iyo midda gumeysiga reer Orobbaad. Taasi waa run aan laba isku qaban karin oo aan maanta marag loo raadinayn. Waa waxyaalaha la yiraahdo waa marag-ma-doonto. Sannadkii 1923kii ilaa maanta waxaa gacan ku jira dhawr buug iyo maqaalado aan yarayn oo Sayidka iyo dhaqdhaqaaqiisii laga qoray, badankoodna waxaa lahaa rag u dhashay dawladihii uu la dagaallamayey, ingiriis ha ahaadeen ama Talyaaniba e. Cidna kama dahsoona inay nimankaasi dantood wateen oo ay ku dedaalayeen baarista gefafkii ay Sayidka iyo Daraawiishi ku dhaceen intii ay dagaalka ku jireen; sababtoo ahayd iyagoo doonayey inay ummadahooda ka dhaadhiciyaan dagaalkii ay Sayidka kula jireen iyo kharashkii badnaa ee ku baxay inay xaq ahaayeen oo la garaysan karayey.



In badan ayey raggaasi ku doodeen, ayaga oo afka dawladahooda ku hadlayey, Sayid Maxamed inuu ahaa nin han weyn oo rabey inuu Soomaalida ka gees iyo ka gees mayalka u qabto, sidaas daraaddeedna ay iyagu ummadda Soomaalida inta raacday mooyaane ay inta kale ka hor joogeen!. Marmar waxay oran jireen wuxuu ahaa nin jidbo diineed hayso oo aan, gaalo la dirir mooyaane, gobannimo maskaxdiisa ku jirin(Fanatic). Qaarkood wayba sii gudbeen, waxayna yiraahdeen wuuba waallaa oo waa iyagii ku dhejiyey magaca foosha xun oo ah «The mad mullah !. Doodahaas oo idili haddii ay wax ina tusinayaan waxay ina tusinayaan sida ba,an ee ay gumeystayaasha reer Yurub Sayidka iyo Daraawiishtii uu hormuudka u ahaa cabsida uga qabeen. Wax kasta kolkii ay ku sabeen oo ay soo loodin kari waayeen ayay ka faafiyeen hadalladaas xumaanta jooga dan lahaa ee ay uga jeedeen inay kalsoonida dadkii iyo isaga isa seejiyaan.

Markaannu u leexanno Sayidka iyo dadkii soomaaliyeed ee jahaadkiisii ka hor jeeday waxaynu og nahay in colaad aan jeefaaf lahayni ka dhaxaysey labadooda dhan. Colaaddaasi waxay ahayd tu gunteedu mabda' tahay oo ku fadhidey dooddii Sayidka oo ahayd "Dadyahow, Jahaadka gaalada nala gala, haddii aad diiddaanna iyaga ayaydun noola mid tihiin, maxaa yeelay, xilli jahaad lagu jiro ninkii gaalada dhankeeda ka soo jeesta ama u garbeeya diin ahaan dhiiggiisu waa hadur" iyo dooddii dadkaas oo ahayd "Kula dagaal geli mayno, Ingiriisna maaro uma hayno e wadaadow ha na rogin!". Dabadeed waxaa sugnaatay in Daraawiish iyo dadyowgaas Soomaalida ahi isaga hor yimaadeen dagaallo kulkulul oo aan ka dhibaato yarayn kuwii Daraawiishi Ingiriis kula jiri jirtey muddada doorka ah. La-yaab ma laha, kolkaas haddii ay dadkaasi Sayid Maxamed ka faafiyeen ceebo foolxun iyo dembiyo uusan badankood wada gelin, waxaana

*nagu maqaalo ah in Ingiriis iyo dadkaas Soomaaliyeed-geeridiisii dabadeed- ku hehsiiyeen in Darwiishnimada loo aqoonsado dhegxumo weyn iyo dhaleeco in lagu tilmaannaadaa cay tahay!. Siyaasaddaasi way meel martay, qayb ahaanna mirakeedii way dhashay, ha yeeshee taariikhdu ma noqoto sida ay koox dan lihi ka dooneyso, intii muddo ah in la weeciyo haddii laysku dayana waxaa hubaal ah inay maalin maalmaha ka mid ah soo ban baxayso iyada oo qorraxda ka if badan.*

*Tillaabooyinkaas aan soo xusnay ee ay ku kaceen Ingiriis iyo dadkii raacsanaa ama xaggiisa u janjeersaday waxay dhaliyeen dad badani inay Sayid Maxmed maanta u yaqaanniin dhiigyacab dilka dadka iyo dhacooda u jeel qabey !. Dadkaasi waxay u haystaan in Sayidku ahaa nin aan naxariis inna lagu ogeyn oo ninkuu xujeeyo aan dilin oo keliya e si bahalnimo ah u dila !. Waxay kaloo u haystaan in Sayid Maxamed ahaa keligi-taliye tiisa mooyaane aan tu kale meelmarin, Daraawiishina ahayd ciidammo uu isagu wax ku fushado oo aan talo innaba iyaga laga filin, wixii uu isagu yiraahdana hadal la'aan u hoggaansama!.*

*Doodahaas dhammaantood oo sidaannu soo sheegnay gumeystayaashu badanaa faafintooda u hawl galeen waxaa loo baahan yahay in qoreyaasheenna taariikhdu waxay ka qabaan ay si tifaftiran u soo bandhigaan. Ragga taariikhda Sayidka qora-naasiibxumo-waxaad mooddaa inay isku daydaan oo uu ninba kii ka horreeyey waddadiisii qaado !. Taariikhda ay qoraan inteeda badani waa dulmar aan dux lahayn oo aan dedaal cilmiyeed ku jirin. Waxaan filaynaa inay ka war hayaan in haddii qof wax laga qorayo loo baahan yahay akhristuhu inuu sadarrada uu akhrinaayo ka ogaado wax kasta wixii qofkaas qalinku uu saa'an yahay ku saabsan. Waa inay akhristaha la noqotaa in qofka uu taariikhdiisa akhrinayo uu ka-fool-ka-fool u arko ama uu rabtiisa la fadhiyo oo uusan dareemin-kororsi mooyaane-wax-waydiin cid kale baahi u haysa.*



*Qoreyaasheenna taariikhda waxaa laga sugayaa inay habkii hore oo dulmarka ahaa ka leexdaan, dabadeedna ay shakhsiyaddii dhabta ahayd oo Sayid Maxamed daaha uga qaadaan dadyowga mugdimugdigu uga jiro, oo aan shisheeye keliya ahayne sokeeyuhuna ku jiro. Ma aha inaynu dadka jaadkaas ah gabayadii Sayidka oo qura wax kaga dhaadhicinno, in kastoo ay mararka qaarkood marag noqon karaan. Ma aha inaynu magmagacawno goobihii dagaalka, dabadeedna shib niraahno sidii dad wax kordhiyey ama sida la yiraahdo gaalo laba ka diley. Waa in si fiican loo gudagalaa habkii maamulka Xarunta, sidii talooyinka lagu gaari jirey, ninka Darwiishka ah iyo hawlihii uu qaban jirey xilliga nabadda loo joogo. Waa inay qoreyaasheennu si cad u muujiyaan tilmaamihii Sayidka u gaarka ahaa ee u suurageliyey inuu hoggaanka u qabto kumanyaal rag iyo dumarba lahaa oo aan markaas ka horow weligood iyo waaqood hebal qura talo ka qaadan.*

*Arrimahaas iyo kuwa kale oo aad u badan, kuna saabsan taariikhda Daraawiishta ayaa jira, inoogana baahan baaris hor leh iyo gudagal kii hore ka geddisan oo cilmi iyo qoto dheeri ku fadhiya. Allow ina solansii!.*

*Annagu, haddaan qoreyaasha riwaayaddaan nahay, in kastoo aannaan ku doodayn inaannu halkan waxyaalahaas oo idil ku muujinnay waxaan isku daynay si fudud inaannu taariikhdaas Daraawiishta qayb ahaan u soo bandhigno, waxaannuna rumaysan nahay inaan buug qura ama riwaayad keliya lagu soo koobi karin taariikh labaatan gu' iyo dheeraad*

soconeysey. Aqoon iyo kartiyi meel kasta oo ay na geeyeenba, waxaannu ku dedaalney inaannu akhristaha u caddayno:

1. Wixii Afrika guud ahaan la soo gudboonaday ka hor intii aan Sayidku soo bixin;

2. Sidii dhaqdhaqaaqu ku bilawday iyo sababihii tooska ahaa ee jahaadka uga baxay;

3. Habkii Daraawiishi u dhisantay;

4. Sidii ay dawladda Ingiriisku dhaqdhaqaaqaas u qaadatay markii hore iyo gadaalkiiba;

5. Madaxdii Daraawiishta iyo kuwoodii ugu magaca roonaa;

6. Sayidka iyo boqorradii Soomaaliyeed xiriirkii u dhexeeyey sidii uu ahaa;

7. Daraawiishi fikraddii ay ka qabtay dadkii Soomaalida ahaa ee jahaadka ugu baxay;

8. Shirqoolkii Canjeel-talo-waa iyo wixii uu Sayidku u qaatay;

9. Murtidii Sayidka qayb ahaan, hadba intii aragga lagu jiro xiriir la leh.

Arrimahaas iyo kuwo kale oo aan yarayn, giddigoodna wax ka taabanaya dhaqankii Daraawiisheed iyo falasafaddoodii ayaannu isleennahay wax baad ka iftiimiseen, annago oo taariikhdana aan illowsanayn, maxaa yeelay, riwaayaduhu waa



fan, fankuna dhab ma wada noqon karo. Sidaas daraadeed, waa inaan loo qaadar dhammaan hadallada riwaayaddaan ku qorani inay ka soo wada fuleen ragga ku hor dhigan; Tusaale ahaan, kolka aad aragtaan Ismaaciil Mire oo geeraar ku hor qoran yahay ha u qaadannina in Ismaaciil geeraarka leeyahay ama Abshir Dhoore hadalka ku hor qoran dhab ahaan laga hayo. Waxaannu uga jeednay oo qura inaannu muujinno wixii uu nin waliba qaban jirey ama Daraawiishta ugu fillaa.

Annagoo quudarraynayna inay riwaayaddaani dad badan wax u tarto, dad badanina ku baraarugaan waxaan jecel nahay inaannu mahad u naqno Jaalle, Dr. Maxamed Aadan Sheekh Xoghayaha Hiddaha iyo Tacliinta Sare oo isagu, asal ahaan, lahaa fikradda dhismaha iyo qorista riwaayadda talooyin door ah oo waxtar ahaana naga siiyey intii aan hawsheeda ku dhex jirney iyo Jaalle, G/le Faarax M. Cawl oo isna abaabulkii hore in badan nagu kordhiyey.

A. F. C. «Idaajaa»

Muqdisho, Okt. 1974

C. X. S. «Yamyam»

*FURITAANKA RIWAAYADDA*

(Intaan aragga 1d la gelin ayaa daaha la furayaa. Waxaa soo baxaya oday coobir ah oo timaha garka iyo madaxaba cirradu saabatay. Waxaa hortiisa yaal rixli iyo kitaab Quraan ah oo dul saaran. Markii daaha la furo ayuu si tartiib ah madaxa kor ugu qaadayaa. Isagoo nal taag darani ku daaran yahay ayuu si deggan oo abwaannimo ka muuqato erayadaan u oranayaa):

«Dib ugu noqo qarnigii sagaal iyo tobnaad guyaashii ugu dambeeyey. Ari aan oodnayn ayaa weer hamuumani ku soo dhex dhacay. Wuu warjeefay. Labo keliya ayaa ka baxsatay. Bahal waliba waaxduu haleealy ayuu hiigay, bahalladii kalena dhacan adag ka saartay.

*(Aamus yar)*

Agoontii xoolaha laga meersaday qaar baa koray. Way gocdeen, ka xanuunsadeen oo ka dhiilloodeen. Way ogaadeen oo ka gubtaanyoodeen. Libaax seef sitaa badyarada Cadmeed ka soo degey. Guhaad iyo caruu qoonkiisii kula dhex dhacay, Qayladuu keenay bay rag quursadeen, ragna u qushuuceen oo dhegaha u raariciyeen. Intii u qushuucday baa badatay. Qoofalkiyo shakaalkaa fardihii laga gooyey oo wegeradka loo adkeeyey. Qalabka ayaa laysu urursaday oo dhiigga birta laga qooyey. Maxaa nin qab weynaa afka ciidda loo geliyey! Maxaa mid aan loo qabin qaali noqday ! Maxaa weerarka butaacadiisii buuraha siigadu qarisay.

*(Aamus yar)*

Ayadoo gardaranihii quustay, qoonkiisuna ka hiilliyey ayay libaaxii qodaxi muddey. Waxaa mar keliya qarsoomay dayax nuurkiisu ifka ku baahey, isagoo hawshiisii qabyo kaga tegey.
Doogtiisiise dib bay u soo baxday, waana tii dillaacday. Caawana dulucdu waa intaas".

*(Isagoo cirka sare eegaya ayaa daaha la xirayaa).*



*ARAGYADA RIWAAYADDA SAYIDKA*

*ARAGGA 1d*

*HAATUF :*

Ka dib markii ay xoogagga reer Yurub ku heshiin waayeen dalalka ay gumeysiga la damacsanaayeen ay ay isugu yimadeen shir taariikhda ku galay magaca ah "Shirkii Berliin" dabayaaqadii 1884kii. Sida magacaasba laga garan karo shirkaas magaalada Berliin ayaa lagu qabtay muddadii u dhaxaysay 15kii November 1884 iyo 30kii Jannaayo 1885, go'aankii u dambeeyeyna waxa la kala saxiixday 26kii Febraayo 1885. Dawladihii ka qayb galay waxay ahaayeen Ingiriiska, Faransiiska, Bortuqaalka, Isbaanya, Beljimka, Jarmalka, iyo Talyaaniga, danta laga lahaana waxay ahayd in Afrika lagu qaybsado oo ay qolaba in goosato, si ay warshadahooda uga baahi tirto dhibaatooyinka ka haystey helitaanka alaabta ceeriinka ee ay Afrika hodan ka ahayd, welina ka tahay iyo shaqaale raqiis ah oo alaabta soo saara. Dalkeenna Soomaaliya ayaa guuldarradii ugu weyneyd ka soo gaartey shirkaas markii cadcad loo kala jaray oo loo kala qaybiyey dawladaha Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Xabashada. Shirkaas. waa shirka dhaliyey kala go'a iyo kala qaybsanaanta ilaa maanta dalkeennu ku sugan yahay.

*TILMAANTA ARAGGA 1d*

Muusiko argagax iyo daryaan leh ayaa la garaacayaa intii hal daqiiqo ah. Daahaa la furayaa. Waxaa soo baxaya miis weyn oo ay hareeraha ka yaalliin toddoba kursi oo laba dheerdheer tahay. Miiska dushiisa waxa saaran xaashiyo cadcad iyo qalimo. Saddex nin ayaa miiska ag joogta oo hagaajinaya. In yar ka dib waxa soo bilaabanaya raggii shirayey oo laba laba u soo gelaya, iyagoo lababa hoos ahaan

u sheekaysanayso. Way fariisanayaan.

DHAR : Shaatiyo cadcad, saraawiil, jaakado kala midab ah iyo Niigteemo dhawr jaad ah. Ergeyga Ingiriiska, kan Faransiiska kan Jarmalka iyo kan Talyaanigu waxay qabaan barneetooyin waaweyn oo madmadow iyo muraayado cadcad oo akhriska loogu talo galay. Nin walbaa hadalka uu jeedinayo waxa u chiibaya kaaliye gadaalkiisa fadhiya oo boorsada u haya. Hadalka waxa bilaabaya ergeyga Jarmalka ee martida loo yahay:

*JARMAL* :

Odayaal maanta shirkaan
Baarliin aan ka aloosnay
Is-aragga reer orobbaad
Waxa loo ambaqaaday
Arrintayna dhex taaloo
Afrikaanka ku saabsan
Weligeed il biyood
Wax kastoo ay ordaanba
Guntuun bay ururaane
Eraygayguna waa
Dhaqaalaha arligeenna
Afrika ciidda dhexdeeda
Alaabta ku jirta
Haddaynaan ku ekaynin
Dhawr asbuuc dabadeed
La arkee in awooddu
Ogoobey is-dhintaaye
Afgarad iyo xeelad wanaagsan
Si asluub iyo deeqa
Hawsha noogu asteeyoo



Nin walbaaba ushiisa
Illeen waa arigaase
Ilbaxnimo ayan taabane
Ha arooro nasiibkii
Hadalkiina wayga intaa
Shir abaabul wanaagsan
Ilaalana haw wada joogto.

*FARANSIIS* :

Rag hadduu ururo
Ama waa aqbal keen
Ama waa arrrin keen
Arrintaa Jarmal sheegay
Oogta uu ka caddeeyey
Anna waan la qabaa
Waan ku sii ayidoo
Oggoli xeerka dhankayga
Waxa ay ku idlaatee
Ariga neefka u weynee
Ahmigaa ku barkayga
Eexana kii taliya
Maaha reer Orobbaad
Arkaayow maqal taa
( Aamus yar )
Ogeysiis mid kaleeto
Warqad buu saaka aroorti
Amxaarada Boqorkeeda
Mililikhii Addis joogey
Odaygii Kiristaanka
U ahaa diinta wakiil
Ku abuura carruurta
Axadkii gardarraystee

Weeraree ah Islaanna
Unuunka qoorta ka gooya
Warkiisoo urursan
Iigu soo andacoodee
Bal maydiin akhriyaa
( Aamus yar )
Ilaa Xaawiyo Aadan
Aamanuu ka horow
Dawlad baannu ahayn
Itaal weynna ma hayno
Annagoo reer Orobbaad
U galliina shirkooda
Qaaraan oodda wadaagno
Ummiyoon wax kasayn
Isku meel aannu joogno
Afartan qoys ka badnayn
Dusha nooga egoo
Aannaan haybna wadaagin
Beryana aamin ka weyney
Umalka aan u qabno
Aan askaaxda ka yeellee
Kuwaa noo oggolaada
Ku amroo weliba
Axmaaraad maanta tihiin
Ogeysiiya sidaas;
Arrintaana wi[illegible]
ka ekoon aan ka yeello

*BORTUQAAL* :

Sida aad u ogtiin
Qaaraan eeggaba haysto
Dhaqankayga aan ku abuurayoo



Aan ku soo ababshoo
Ubadkoodu barteenoo
Afkeyga aan ku barbaarshey
Angooliyo Moosambiik iyo
Jasiiraad aan ka fogeyn
Ha la ii daayo intaas
Alaabta aan ka gurtee!

*TALYAANI* :

Nimanyow Afrikaanka
Ilaalaan beri geeyayoo
Soo eegeegay dhexdoodoo
U soo yeeshay aqoonoo
In alaabta ku gaaxsan
Ceeriinkaa ururay
Yurub ay anfacayso
Ii soo sheegtay akhbaarta
Anna maanta ergoy
Midi wayga afeefe
Dhulkaygu waa in la koobay
Ummaddaa ku dhex noolina
Uluufaad kor u dhaaftay
Asturi waayey dadkiiye
Meel agaasinka hawsha
Beryo aan aftidayda
Danaha reer Orobbaad iyo
Ku ilaaliyo diinta
Ha la ii oggolaadaan
Dooddaydii ku idleeyey.

*INGIRIIS :*

Nimanyahow gar waayeel hadday gobi ka faallooto
Garashiyo aqoon dheer haddii geedka lagu baaro
Guurtidu hadday sheekadii samo ku goyn weydo
Haddii lagu dhex guuloo murtidu gees u bixi weydo
Garaad iyo haddii .ii gu weyn loo gudbiyo hawsha
Dadku uma gudboonee haddii aarku gacan saaro
Libin uu ka gaariyo runtuu gebagabeeyaaye
Aniguna geddii baan ahoo galabta joogaaye
Guyaal badan nin waday baan ahaa goolka reer yurube
Gaashaan qaad asaaggii ka baqoo geesiyaan ahaye
Gobannimo nin sheegtiyo libaax geyllamaan ahaye
Giddigeed adduunyada intay milicdu goobayso
Calankayga guudkaan ka suray gaarna waan dhigaye
Gadaaldhalad nimuu ka cabsadoo gooddiyaan ahaye
Gooba badan nin soo maamuloo gaalibaan ahaye
Afrikada nin guuto u diroo gaarey baan ahaye
Durbaankaan garaacniyo tashiga gawda laga saaray
nin walbaaba dabinkuu guntiyo xarigga uu giijey
Sida goolka loo qalanayiyo waaxyo kala goynta
Tusmo guriga laga oodayiyo nin iyo geestiisa
Anigaa galaa bixinayoo wada guddoonkiiye
Giddigiin haddaad yurub tihiin gees isugu leexda
Nasiibkii midkuu gaabiyiyo samada kuu geeyo
nin walbow waxaan kuu gartiyo qaado gucunkaaga
Gini iyo Angooliyo intii gudub u weydaarsan
Burtuqaalka waa loo gartaye gogosha haw laabo
Galbeed iyo intii Jaad ka godan Toogo garabkeeda
Faransuhu jabuuti ha galoo haw gambiyo weelka
Xeebtaa hindiya ee goglane arigu uu gooho
Talyanow gawaan Liibiyaad gaar isugu qaado



Jarmalkaa gob sare sheegtay ee gurigi aan joogno
Ruwaanduu u guuriyo inuu Burundi googooyo
Taanganiika waa loo gartaye galabta haw xiiro
Baljim koongo waa geli karaa gaaska haw bixiyo
Dhajkow gacalle meel gubatey oon godob ka doonaayo
Si aan gibil madow loogu arag ood u dabar goyso
ood dhaqanka uga guurisood keenna ugu geyso
Afrikaanka koofure u guur caawa gudaheeda
Guga soo socdana ii war keen saad gun uga gaartey

*( Aamus yar )*

Googaale sheekada haddaan sii giraangiriyo
Rag calool gubyoodaa jiroo laxawsi gaaraaye
Qaar diinta gaar ugu naxoo gaagufaa jira e
Kiinnii garawsada ra'yiga arigu soo gooyo
Garaad yaraha naxariis u gala oo an gudan **hawsha**
Wuxuu galabsadoo nala gudboon yaa u noqon **gooni**
Gumeysiguna waakaan u turin meeshii uu galo e
Gobannimo midkii doonayoood ciil ka garataanba
Gommoddiyo boonaha gooya oo garabka naafeeya
Kan gardiid noqdee aan maqlayn waxaad ku goysaanba
Oon soo gurguurane jilbaha geed ka soo xagannin
Geesinnimo midkaad uga baqdaan gadaw ka laalaadsha
Gurricii su'aal gaaban oo godan ku weydiiya
Ilbax baan ku gaarsiinayaa hawsha ugu gaabi
Ra'yigaan idiin wada guntana geliya laabtiinna

*( Aamus yar )*

Afartaa guddoonkaan bartiyo galayaxaygii dheh
Gacantii nin waayee'a iyo deeqdi aan galay dheh
Afar kalena aan sii gudbee gocasho ii laaban

Warqaddii na soo gaartey baan soo garwaaqsadaye
Boqorkaa na soo gacalsadee garab na wediistey
Ee gaarka diintaan ahiyo geesinnimo sheegtay
Ee yiri gasiiraan degaa cadawgu uu gaado
Muslinkaana ii gooddiyoo ii gilgila hooto
Asagoo an garanayn wuxuu yurubku goobaayo
Inkastoo ay gibilkiisi tahay taan u wada gooshney
Oy tahay wuxuu goynayaa gacan ku taal jaalki
Godimmada halkuu saartay iyo geedku naga tuugay
Ha ka galo hadduu cadawgi gubey guul uga helaayo
Odayada kalee goommanee geedka nala jooga
Ayagana wax ii gaarahaan gacalnimaw siine
Waxba yaanay giir xun iska kicin waw galxinayaaye
Haddiise faras nin gaalibi yaqaan guudka laga saaro
Asuu weerar galo oo beryana golongol dhuubnaado
Gebagabada si uu goor walbaba guuto uga raayo
Markuu libinta gaaraa wan weyn galab la siiyaaye
Sixin baa gardhada loo marshaa lagu galaalaaye
Koorahaa shalmado loo goglaa raaxo haw go'o e
Aniguna haddaan xuurto galay way gar toogaduye
Afrikaanka afartiisa gees gun iyo baarkiisa
Bari iyo galbeed iyo dhexdiyo heeladka u gaara
Gobol iyo degmiyo beel markii laysu wada geeyo
Giddigii anaa wada xukuma guud ahaan magaca
Badda anaa ka soo geli kariyo kii an garab siiyo
Anigaa shirkado soo gilgila oo gundhiya maarta
oo xeelad gaara u yaqaan ganacsigii beeca
Oo aan gabaabsiyin hayoo waan la soo geline
Ninkii gaar wax ii bidi lahaa hayska geeddiyo e
Sow hadalka lama kala gogtee ma an gadaan saarin
Sow goolki aan qalay wankii nooma kala goynin
Galabtana shirkeennii halkaas noogu gola jooja.



*Shirkii halkaasuu ku dhammaanayaa, in kastoo aan raggii barkood qaybtii ku qancin oo saluug ka muuqdo. Kolka ay wada baxaan ayaa cod aan loo jeedin oo heeskan soo socda qaadaya la maqlayaa.*

Wakaa damey ilayskii,dayixii wakaa dhacay.
Afrikaay Dalkaagii, waa kaa la diga rogey.
Geesi ceeb ka diririy o, miyaan danabba kaa dhalan, mise way dahsoonyiin.?
Dahabkaaga Duunyadaada Diintaadaa, Reer Yurub ku soo duulee miyeydnaan damqanahayn ?
Maa la diido laga diriro, dhiigga ciidda lagu daadsho ?
Dugayey way iyo ciil, illeen doqoni calaf ma leh, maa digtooni laga helo ?
Barwaaqada dalkaagaa heedhe, lagugu dilayaa Afrikaay
Cosobkaaga dihin baa heedhe, lagugu dilayaa Afrikaay
Adna dulucda maad garan, cadawgu u dan leeyahay
Waa maalin kuu daran
Waa maalin doogtani
Dib u soo kacaysaa Afrikaay
Dabinkaa la dhigayaa
Ubadkaa u daran yahay
Dirkaa qoomameeyaa
Dib isaga waraystaa Afrikaay

## A R A G G A 2d

### *TILMAANTA ARAGGA*

Daahaa la furayaa. Waxaa muuqanaya doon shiraac leh oo badda xeebteeda taal iyo dad badan oo ka soo degaya.

Dadkaas oo Soomaali u badan waxay qabaan go'yaal iyo bakoorado iyo duub. Qaar baa saraawiil iyo jubbado

qaba. Nin Ingiriis ah iyo nin turjubaan ah oo Soomaali ah ayaa qofkii soo degaba cashuur ka qaadaya. Afar qof markii lacag laga qaado ayaa ugu dambeysta waxa soo gelaya Xaaji Maxamad oo khamiis cad, cimaamad, iyo go' bafto ah qaba, dallad iyo santuukhna gacanta ku sita. Saajinkii buu damcayaa inuu dhaafo, markaas buu turjubaanka ku oranayaa :

*SAAJIN INGRIIS AH :*

U yeeroo ninka jooji
Alaabtiyo keen dheh santuukha
Amarkuu ku gudbaayo
Maadigow oggolaaday ?
See ii dhaafi karaa ?

*Turjubaan (oo Xaajiga eegaya):*

Amarka saajinka raacoo
Ee yaa Xaaji istaag
Alaabta aad wadato
In laguu oggolaado
In lagaa afro duubo
Miduun bay maanta ahaane
Ninka gaalna addeec
Anigana ha i diidin.

*SAAJIN INGIRIIS:*

Agagaarka baddaan
Axadkii ku yimaada
Alaabtuu sito oo dhan iyo
In isaga la cashuuro
Amarka dawladda weeyee



Haddaanay kuu oggolaan
Beledka aadi ad mayside
Aannu eegno e keen
Abxaddanaad wadato.

*XAAJI MAXAMAD*

Waxaan ahay nin islaamoo
Ummaddii nebigiiyoo
Ashahaado qiraayoo
Ma aqaan Ingiriis
Halka eegga la joogiyo
Agagaarka baddaanna
Ummaddaa ku dhex nooi baa
U socdaa amarkeeduye
Bal su'aal isagoo
Beriguu imanaayey
Yuu cashuurti u dhiibay
Mise waa u illoobey
Imminkaan ka rabaaye ?

Turjubaankii ayaa erayadaas af Ingiriis u rogi waayeya. Markaas buu oranayaa, «Mad...Mad..Mullah. Mad Mullah». Waa wax waalan.

SAAJIN INGIRIIS. Buug yar iyo qalin buu jeebka kala soo baxayaa, markaasuu wuxuu leeyahay isagoo qoraya, «Mad Mullah».

Turjubaankii buu ku oranayaa, «Meesha ka saar».

*TIIMAANTA ARAGGA :*

Oday indho la' oo dhar jeexjeexan iyo tusbax sita oo dad meesha maraya yaboohsanaya. Xaajgii baa soo gelaya. Aw Cilmi buu ku dhaygagayaa. Markuu u garto inuu yahay Aw cilmi oo ay isku ardo ahaayeen ayuu ku boodayaa oo oranayaa :

*XAAJI MAXAMAD :*

Iska warran Aw Cilmi.

*AW CILMI :*

Waa kuma ?

*XAAJI MAXAMAD :*

Maxamad Cabdille Xasan oo aad isku xer ahaydeen, Xajkiina ka yimid.

*AW CILMI :*

Ha ! Ha ! Ha ! Ma Maxamad - Laystaan baa ?

*XAAJI MAXAMAD :*

Waa isagiiye, goormaad indho beeshay ? Meeye xoolahaagii ? Meeday xertaadii iyo dugsigii aad haysey ?

*AW CILMI :*

Maxamadow, intaad xajka ku maqnayd wax weyn baa dhacay. Xoolahaygii waa la mooraduugay. Dugsigii waa layga xirayoo ardadii waxaa loo dareershey Dhaymoole. Baaderi baa kaxaystay. Waxaa loogu dhigaa diinta Kiristaanka, toodiina waa laga leexshey. Maxamedow intaad dalka ka maqnayd waxyaalo raggii rag



ahaa iska gawrici lahaayeen hadday la kulmaan ayaa dhacay. Anna waxaan Ilaah ku mahadinayaa in kastoo maqalkoodu i dhibaayo inaanan arkaynoo aan ka indho la'ahay. Waxaan ku leeyahay Maxamadow: Bal dhegtaadana maal, ishaadana u fur saymaha maanta Soomaali haysta.

(Iyagoo isla goobtii taagan baa waxa ku soo yaacaya shan wiil oo shaarar iyo saraawiil cadcad sita oo macatab u wada xiran yahay. Markay in yar u soo jirsadaan labadooda ayay oranayaan : Alla waa Aw Cilmi. Waa macallinkeennii !. Xaaji Maxamed baa wiilashii hoos u eegaya oo ku arkaya macatabka u wada xiran).

*XAAJI MAXAMAD*

(Isagoo macatabkii mid ka jaraya): War waa maxay waxa qoorta kuugu jiraa ? Magacaaga iyo ina ayahaagase maxaa la yiraa ?

*W I I L 1 :*

John Jaamac Dhunkaal oo waxaan ahay reer Faadder ee macatabkayga i sii yaan Baadirigu caawa i diline !

*AW C I L M I :*

Rabbi og, xaaji Maxamadow, waa ina Jaamac Dhunkaal Sugulle oo waa kuwaan kuu sheegayee aan macallinka u ahaa ee ma macatab baa qoorta ugu jira? Allaylehe inteedaan ku sugay aradka Gaaroodi !

Waataan Maxamadow ku iri, "indhaha iyo maanka u fur waxa maanta Berbera yaalla".

(Markaas buu soo gelayaa Baaderi Faransiis ah oo dharka ragga diinta qaba oo ey wata. Markaas baa inamadii ku yaacayaan).

*WIIL 1:*

Oo faaddar, wadaad indhola' iyo mid waalan ayaa macatabyadii naga goostay.

*BAADERI:*

Iska jira wadaaddada had iyo jeer. Had-dii kale, sidoodaas ayaad mid waalan iyo mid indhola' noqonaysaan.

(Baaderigii baa carruurta kaxaysanaya. Xaaji Maxamad oo Aw Cilmi daaddahaynaya baa Baaderiga dallad dhabarka uga dhufanaya isagoo leh:

*XAAJI MAXAMAD:*

Allahayow, maanta jahaad intaas baan awoodaa!

*ARAGGA 4d*

*TILMAANTA ARAGGA:*

Masaajid lagu werdinayo oo Xaaji Maxamad ka dhex muuqdo. Wadaadkii mu'addinka ahaa baa kacaya oo addimaya. Markuu marayo «Xaya Cala Salaax» ayaa xab-bad lagu dhufanayaa. Wuu dhacayaa, markaas baa la wada kacayaa oo maydkii lagu yaacayaa. (DAAHAA LA XIRA-YAA). Waa la furayaa, waxaana la arkayaa dadkii oo salaamo naqsanaya. Xaajigii baa istaagaya;

*XAAJI MAXAMAD:*

Dadkan muslinka ahow, anigu dhowaan



baan Berbera imid. Intii aan joogeyna waxyaalo badan oo laga dhiidhiyo, ishuna ka naxdo ayaan kala kulmay. Waxaana u dambeeyey meydkaas la sii sido ee aynu maragga iyo goobjoogga u ahayn. Ma hurdada gaalka ayaynu salaadda u deynaa oo aadaanka uga aamusnaa?

Eyguba waa ku qayliyaa oo annaba kama seexanno. Wax kalaa meesha ku jira, la arkise doonee. Ma loo dulqaadan karaa? **Maxay daawadeedu tahay?** Dalka ma ka guurnaa? Diinta mawga baqannaa? Maya! Allaylehe ilama aha.

Nasabnimo ma aha. Waa inaan la di-rirnaa. Dalka innagaa leh. Dadka la laynayaa waa dadkeennii. Carruurta la gaalaysiinayaa waa durriyaddeennii. Jahaad baa inagu waajibay (inta uu hadalka wado dad baa masaajidka midba mar ka baxayaa, iyagoo cabsiyi ka muu-qato. Dhawrkii soo haray nin ka mid ah ayaa istaagaya oo oranaya):

Allaylehe, waa runtaa. Wax loo adkaysan karo ma aha waxa Ingiriis wado ee maan-ta Berbera yaal. Eel xun bay reebi doon-taa. Shiikhow waa kugu raacsanahay ee ha laysaga yimaado. (Askari jaliilad wada ayaa inta kabaha iska bixiya ma-saajidka soo gelaya oo xaajiga hor dhiga-ya).

## *ARAGGA 5d*

### *TILMAANTA ARAGGA:*

Xafiiskii waaliga oo ay fadhiyaan Muuse Igarre, Aw Gaas iyo odayo kale. Waaligii baa soo gelaya, markaas baa odayadii wada joogsanayaan. In yar ka dib ayaa Xaaji Maxamad oo labo nini la socdaan, askarigiina la socdo soo gelayaa oo istaagayaa.

Muuse wuxuu qabaa Khamiis guduudan iyo cimaamad iyana guduudan, wuxuu xigaa waaliga. Odayada kale waxay qaban dhar wadaaddood iyo tusbaxyo. Waaligu wuxuu qabaa suun madow iyo niigtayn midab leh, Xaajiguna dharkiisii hore):

WAALIGA : Sow Xaaji Maxamad Cabdulle Xasan laguma yiraahdo ?

XAAJI MAXAMED : Ninkaad sheegayso waa ahay. Maxaa laygu yeeray ?

WAALIGA : Xaaji waxaa ayaamahanba wararku igu soo gaarayeen inaad fadqaiallo magaalada ka waddo ood dadka ku guubaabineysey dawladda Ingiriiska iyo taajkeeda inay ku caasiyoobaan. Taasina waxay i tusaysaa inaad lid ku tahay ama aad ka hor jeeddo Maamulka Imbaraadooriyadda Ingiriiska weyn iyo Queen Victoria. Maxaad ka leedahay ? Ma dafiraysaa, mase waa qiranaysaa ?

*XAAJI MAXAMED: (markuu in yar aamusnaado):*
Waa qirtay oo intaas oo dhan lid baan ku ahay ee adigu waxaad lid ku tahay ma og tahay, mase waa kuu sheegaa ?
WAALIGA : "Go on !" soco



XAAJI MAXAMAD : Ma og tahay inaad lid ku tahay diinta Islaanka, mase waa kuu sheegaa. Ma og tahay inaad danaha dadka iyo dalka Soomaaliyeed lid ku tahay, mase waa kuu sheegaa ? Carruurta ka ab ka ab muslinnimada lagu dhalay inaad macatab u xidho ma Queen Victoria baa kugu og, mase dadkaa walaayad kuu siiyey ? Wadaad addimaya oo ilaahiis hor taagan in la dilo maxaa banneeyey ? Ma raallaan ka noqdaa ?

WAALIGA : Waad hadal badan tahay. Waxaan laguu dirsan baad dhex dabaalatay. Orod iska tag, magaaladana ha ka bixin. Digniin waad qabtaa.

XAAJI MAXAMAD : Tii rabbay noqon ! (Xaajigii waa baxayaa).

WAALIGA : Maxaad ninkaas ka leedihiin ?

AW GAAS : Ka'yigaygu ma qarsoona. Waa sida qorraxda. Haddii aan wadaadkaas maantaba la qaban oo aan Ingiriis gacan ku dhigin meel fog baa laga dooni ! Haddii aan madaxiisa iyo manjihiisa laysku xirin oo dan looga baxo waa la isweydiin ! Haddii uusan miyi aadin oo waxa uu ku hadlaayo dad badan ku hodin Aw-gaas layma yiraahdo ! Masaajidka uu goor allaba ka istaagayo iyo qaadka uu xaaraamaynayo haddii aan laga joojin wallee waa la fasahaadi !. Wadaadku waa masiibo ordaysa, waa nin aad u dhiirran oo aan cabsi aqoon. Ha laynaga qabto !. Ma la diiday ? Dooddaydaas meel ha la iigu qoro oo yaan layga illoobin !.
MUUSE IGARRE : Waxba ha ka welwelin. Sow tolkiis ma taqaannid. Dhulkanba ma degaan. Hadduu Berbara dhan uga baxo ama wuu soo noqon ama harraad baa dili.

WAALIGA : Kaasoo kale dawladda Ingiriiska waxba kama qaado. Immisaan wadaad waalan aragnay. Hadduu

tallaabada meel habboon dhigi waayana waa la xakamayn doonaa.

*HAATUF:*

Xaaji Maxamad Cabdille Xasan haddii uu labo sano ku dhowaad Berbera joogey oo uu intaas guubaabin iyo jahaad afka ah ku jirey, meel alla meeshii laysugu yimaadana uu Ingiriiska iyo taliskiisa ku cambaaraynayey, intaas oo dhan kolkii uu muddadaas ku jirey oo uu wax u dheg jalaq siiya uu waayey, arkayna inaan reer Berbera dhiidhiga isaga hayaa iyaga hayn wax kastaaba ha ugu wacnaadeene ayuu talo ku gaarey inuu miyi u baxo oo Nugaal iyo Hawd ka qalqaalo jahaad hubaysan oo uu isagu garwade u noqdo, reer miyina tiir iyo cudud xoog leh u ahaado. Isagoo reer magaalka iyo cabsida ay gaalada ka qabeen ka murugeysan ayuu miyi yimid oo ka unkay Dariiqo marka dambe caalami ahaan loo aqoonsan doono inay tahay xoog aan la mari karin oo Xarumaha Yurub welwel loogaga sheekaysto.

*ARAGGA 6d*

*TILMAANTA ARAGGA:*

Dad reer miyi ah oo geed hoostiis fadhiya. Faraha ayay isku taag taagayaan iyo ulo. Qaarkood way qaylinayaan. Iyagoo sidaas ah ayaa Xaaji Maxamad iyo saddex Berbera kala yimid la soo joogsanayaan.

Markuu soo dhowaadana way aamusayaan. Dadka reer miyiga ahi waxay qabaan labo labo go', waana qaar qaawan yihiin, giddigoodna ulay wataan.

XAAJI MAXAMAD : Salaamun calaykum. Maxaad sheegteen ?



(Wax yar haddii laga aamusnaado ayaa midkood oranayaa) :

NIN 1d : Dareen ma ogin. Nin iyo waagii. Wax jira Allaa og. Wax weydiin ogaal. Waa sidee maxaad adigu sheegtay ?

XAAJI MAXAMAD : (oo dallad hagoogan) : Anigu nabad. Waxaan wadaana wejigaygay ka muuqdaane maxaad meesha isugu keenteen ?

NIN 2d : Shiikhow waxaan isu keennay hawl adduun iyo rag xaalkiis. Labo qolaa meesha loogu gar qaybinayey. Rag dhiiggiisaana lasy weydiinayey. Hadalkiina meel ciriiriya ayuu marayaaye bal soo fariiso aad noola ur bixiside.

XAAJI MAXAMAD : (oo dalladdii duuduubaya) : Reero guuray ninba haayad hay. Kala fogaa fool iyo lulmo. Dundumoy dugsi baan ku moodey, dareen baase iga kaa galay. Ninkii qayrkii loo xiirayow adna soo qoyso. Ismoog aqal bay aslaysaa. Taladaan la socdey iyo taad waddaan way kala durugsan yihiin.

NIN 3d: Wadaadow, hawlaa na sugaya, cido dhanna ciidan baan u nahay. Adiguna intii geel oommani ka wabxo ayaad gogoldhig waddaye bal waxa kaa guuxayana raaci.

XAAJI MAXAMAD : Waxaynu, dadow, nahay ummad yar oo dal yar deggan. Dusheenna waa la rartaa, mana diidno. Waa laysku keen diraa, waxyeelladana kama damqanno. Show idinma soo gaarin in gumeysi inala soo dersey, Show maba dareensanidin in dalkeenna kufri ka talinayo. Waa diinteenna iyo duunyadeenna waxa lagu duullaan yahay, Ma raalli baad dulmiga ka tihiin, maad ka gilgilataan. Intaad diyada isu haystaan, idinku aad isdileysaan, gaalada

maad la dirirtaan. Dugayey ! Axmed-gurey ma deyn jirin, gaal dalkiisa yimidna uma diirnixin. War yaa carruurta gaalada laga dhigaye dani ka haysaa. Yaa u diirnaxaya culimada la laynayo. Yay galiilyo ka haysaa maalkeenna la dhoofinayo, dadyowga kalena lagu dheefinayo. Dulliga Berbera haysta yaa ka damqanaya, mase reer baadiyow, waxaad ius haysataan in dadka magaalada joogaa aysan walaalihiin ahayn. Cadowga haystaa uusan cadowgiin ahayn. Waxyeellada soo gaartaa aysan idinka idin soo gaareyn. Ma aha saas walliihi (3 jeer). Kolkuu iyaga hantidooda marsado waa geeliinna, waa lo'yowgiinna, waa riyihiinna waxa uu u soo gaambiyaa. Geesinnimo iyo ragannimo had iyo jeer idinkaa laydin bidaaye, hoy fadhiga inaga kiciya aynu ceebta iska rognee !

NIN 1d : **Shiihow culimo kitaab baa lagu ogaa, dagaalse** maxaa u geeyey. Yaa dagaal ka taliya yiri? **Haddaad kulaylka** colaadda og tahay sidaas uguma aad dhiirrateen !. Waxaanse kuu sheegayaa, waxba yaan hadalku ila tegine, annagu Ingiriis lama dagaallami karno, dawlad naga xoog badanna beerka uma dhigi karno.

XAAJI MAXAMED. **Nin dhulkiisa jooga lagama xoog bad**naado. Nin ceebi wax ka dhintana lama jebiyo. Dhirtaa kuu dagaallami. Xoolahaa kuu dagaallami. Ceeshaa kuu dagaallami. Waddooyinkaa kuu dagaallami.
NIN 2d : War wadaadow waa dhaqan nahaye ha na rogin. Maxaadse ku dagaallamaysa, ciidanna saddex nin baad ka wadataa, hubna ul baa ka sidataaye !.

XAAJI MAXAMAD : Ciidan waa midkaan idinka dooneynaa, hubna iyagaan ka furanaynaa. Aadkeedna nin rag haystaa hub ma waayo.



NIN 3d : (Ismaaciil Mire) : Wadaadku hadal xun ma oran, gobannimana waa u dhalasho. Ceebina waa wax laga dhiidhiyaa. Anigu Ismaaciil Mire ahaan iyo wixii igu talo ahiba waa ku raacsan nahay jahaadka uu inoo wacayo.
Abshir Dhoore : Xooggeyga intaan nin muslim ah oo walaalkay ah ku dili lahaa, gaal baan, qoodhay iyo **xeraday, ku** dilayaa, xaqna lagama adkaado !.

Shiikhana itaal iyo waxaan awood leeyahay waan ku taageeraya. Ninkii diidow yeelkaa.

(Dadkii meesha joogay intoodii badnayd ayaa inta istaaga ku dhawaaqaya : Waa ku raacnay awgayow. Na hoggaami oo na dagaal geli. Kuwii diidayna inta ninka afraad hadlayo ayey dibadda u baxayaan).

## *A R A G G A 7d*

*TILMAANTA ARAGGA :*
Sayid Maxamed oo xer la fadhiya, Warmo iyo torreeyo ayay wada haystaan. Go'yaal cadcad iyo tusbaxyo ayay ka siman yihiin. Qaar baa quraan dhiganaya oo looxi dhabta u saaran tahay. Askari qori degta ku sita oo surweel gaaban oo kaakiya qaba ayaa u soo gelaya oo oranaya :

ASKARI : Culima Alloy maxaad sheegteen ?
DARWIISH 1 : (in yar dabadeed) Nabade, maxaad waddaa ?
*ASKARI :*

Waxaan wadaa buntukhaanoo
Waan la soo baxsadee
Beecna waan ku rabaaye
Bulshadiinna shiraysaa
Ma u baahi qabtaan ?

*DARAAWIISH OO IDIL MAR KELIYA :Haa! Haa! Haa!*

*SAYIDKA :*

Ma geel baad ku rabtaa ?
Ma giir baad ku rabtaa ?
Ma gabar baad ku rabtaa ?
waxaad tahay nin garaadloo
Khiyaamaynaya gaalee
Waa lagaa gadayaaye
Xooluhu gooyana sheeg ?

*ASKARI ?*

Gabdhiyo giir uma baahniye
Geel uun baan ku rabaaye
Abeer goojo la booddey
Gurrin dhawr curatay
Galoof aan toban gaarin
Iyo awr gurgur buu
Gooyaayoon ku rabaa.

DHOWR DARWIISH BAA MIDBA MAR ORANAYA :

Sayidii, anaa bixinaya· Sayidii anigu aan bixiyo!

SAYIDKA :

Xoolaha waynu wadaagnaa, qorigana waynu wada leennahay. Waxba ma kala lihin, ninkii bixiyaaba waa kii kale. Warsamow adigu bixi.

*SAYIDKA :*

(oo askarigii la hadlaya) : Aabiyow, haddaad kolley gaalo ka soo baxsatay, ducaad qabtaaye, nala joog oo jahaadka nala qalqaali.

*ASKARI :*

Waa yahay shiikhow.

*SAYIDKA (oo taagan) :*



Waxaan nahay dad islaamoo
Kulligood isku diinoo
Afiyo isku diiroo
Wada jooga dalkaanoo
Duunyaduna ka dhaxaysoo
Daraawiish la yiraahdo
Dantaan maanta wadnaana
Waa inaan gaalo ku duullo
Aan dagaal ku bilawno
Dalkeenna aan ka kaxayno
Innagu dawlad ahaanno
Dib haddaan u xusuustana
Taariikhdu way darartaaye
Horteenna rag ka diiroo
Dulligaas ina saaran
Ingiriis uu ka diidaye
Xaqoodii la dedaayey
Daaha ay ka rogeenoo
Gaaladii diirka caddayd
Dambaska ay ka dhigeen
*(Aamus yar)*
Midna wayga daliile
Dameerka waa la rartaaye
Hadduu diiday yiraahdo
Afartaa la dul saariyo
Jarahaa iska diido
Dibindaabyada haysiyo
Dulligaas ma muteen
Dadka aan isticmaarka
Xumaantiisa ka diirine
Dusha uu ka rartaana
Sidaas bay ku dambayne

Inta aan dulligaasi
Dalkeenna aad ugu faafin
Yaa ka daafacaya ?

*DARAAWIISH (oo wada taagan) :*

Daraawiish ! Daraawiish ! Daraawiish :

*SAYIDKA :*

(isagoo baxaya oo qorigii degta u saaran yahay) :

Daraawiishey, sidii aad gaalo ula dagaallami lahaydeen falankeeda qabta, tabta dagaalkana isku carbiya.

(Daraawiishtii tababar dagaal bay gelayaan, inta ay dhexda kaga jiraan ayaa ninkii askariga ahaa dhuumanayaa oo baxsanayaa).

*SAYIDKAA SOO GELAYA, MARKAAS BAA TABABARKU JOOGSANAYAA OO UU ORANAYAA :*

*SAYIDKA :*

Dadkeennu waa saddex jaad
Dantuna waysku halkii
Inta duuli karaysoo
Dabka qaadi karaysiyo
Maarre-weyn diriraysiyo
Dar kaloo ah qusuusiyoo
Xilka aynu dul saarro
Talada deeddaminaysa
Qaarka duunyada raacoo
Dibin hawdka ku foofshoo
Daribteeda ku naaxiyo
Dambarkeeda dhamayno
Reer Beede waa u dedaal



Waa digaag hal ha qaado
Isku keen wada duuboo
Waxa weeye danteennu
Dalkeennoon cid kaleeto
Dawladdiis noqonnin.
Diinteennoon beddelmin iyo
Gaaladoon dabar goyniyo
Waa dagaal ballanteennu
Doorarkaan magacaabina
Soo duwoyda horseedka
Duullaankay gar hayaan
Waxba yaan laga diidin
Ninba gaas isku duuban
Docda uu ka gelaayo
Haw diyaariyo weerar!

(Markaas buu toddobada ciidan ee Daraawiisheed midba nin maqaddin ah u magacaabayaa, isagoo midkood kasta cimaamad ku duubaya oo oranyaa):

*SAYIDKA :*

Mahiiggaankan wada jira
Taargooye maantaba
Adigaa u maqaddina
Mahiiggaankan wada jira
Goleweynahaa mudan
Abshir baa u macallina
Mahiiggaankan wada jira
Madhaafaanka indho - badan
Cismaan baa u maqaddina
Mahiiggaankan wada jira
Dharbash lagama maarmee
Xirsi baa u maqaddina

Mahiiggaankan wada jira
Miinanloo iskaafiya
Yuusuf baa u maqadina
Mahiiggaankan wada jira
Shiikhyaaloon la mari karin
Ibraahim baa u maqaddina
Mahiiggaankan wada jira
Ragxun muruqyo waaweyn
Boos baa u maqaddina.

*A R A G G A 8d*

*TILMAANTA ARGGA :*

Xafiiska Ingiriiska ee Berbera. Sarkaal dhar askareed lebbisan baa soo gelaya. Markuu salka dhulka dhigo in yar dabadeed ayaa askarigii, Aabi, soo gelayaa, isagoo arga-gaxsan oo kaakigiisii qaba.

*SARKAALKA :*

War halkee ka timid ? Aaway shaqadii aan kuu diray ?
Sir, waataad i dirteenoo
Aan miyi xoolo u doonoo
Magti Dooddi warfaa
Ku dambeysey xaggiisa
Anoo soo daldalaaya
Ayaa ciidan la duuboo
U diyaara dagaaloo
Dab iyo haysta rasaasoo
Daraawiish la yiraahdo
Uu duqii u sarreeyey
Wadaadkii duubka lahaaye
Dorraad aad u digeysey



Ayuun baa dug i siiyey
Kolkaasaa lay garbo duubay
Dacay laygu qataaray
Jeedal laygala daalay
Dabkiina wayga furteen
Dirqi bayna naftayda
Ku daayeen noloshaydoo
Sidaasaan ku dambeeyey.

(Markaas buu sarkaalku askariga iska dirayaa oo mid kale u yeerayaa, kuna oranayaa) :

*SARKAALKA :*

Mee Shiikh Ismaaciil ?
Iigu yeera Caaqillada. Aaway Xaaji Muuse: degdeg iigu keena.

(Shan oday baa soo gelaya oo sarkaalka ag fariisanaya. Markaas buu joogsanayaa oo oranayaa):

*SARKAAL :*

Wadaadkii duqa waalan
**Dorraad aynu ku sheegnay**
Ciidan buu dumanaayey
Ingiriis la dagaala
Dab iyo waa dambar kee?
Duufaan iyo waa biyo kee?
Midka aynu ku deyno
Degdeg iigu caddeeya!

XAAJI MUUSE (oo taagan, duub guduudan qaba):
Ninkii duubka lahaaye
Dorraad aan u digeyney
Inuu ciidan dumaa
Waa laxay dibi dhal

Dabagaalle maroodi
Tabco haw dedejo
Dulucdeeduna waa
Ciidankuu dumayaa
Dad ayay ka yihiin
Dabkuu qaadanayo
Yaa u soo diranaaya ?
Digsiguu dabka saarto
Ayaa xaabo u dooni
Waa ina daaman riyaadloo
Ilaa Doollo u gaaro
Duq taqaan heli maayo
Waxba yaan lagu duufsan
Haddii aad talo doontana
Warqad aan u dirno
Dusheeda aan ku qorno
Dumbuqaad xadday keen
Haddii kale deldelaad iyo
Isdiyaari qurgooyaa
Laguu soo dirayaaye !

(Markaas baa warqaddii halkaas lagu qorayaa oo askari meesha taagan u gee la oranayaa).

*A R A G G A 9d*

*TILMAANTA ARAGGA*

Daraawiish iyo Sayid Maxamed oo markaan qoryo badan haysta. Dermo dhawra ayaa lagu hadhiyaa, Sayidkana kitaab iyo qori baa hor yaal. Ismaaciil oo qori wata ayaa soo gelaya oo oranaya :

ISMAACIIL MIRE : Sayidii nin askari ah oo Ferenji soo diray ayaa illinka taagan. Wuxuu doonayaa inuu ku arko oo warqad uu sido kuu dhiibo.



SAYIDKA: Warqadda ka soo qaad; isagana aqalka gee oo sooryee. Ismaaciil : baa markaas warqaddii soo qaadaya oo Sayidka u dhiibaya. Markaas buu oranayaa) :

SAYIDKA : Daraawiishey, qorigii aynu gadannay ayaa Ingiriis leeyahay waad xaddeene soo celiya. Maxaa talo ah ?

*DARAAWIISH (mar qura):*

Sayidii aan dagaallo
Gaalada aan ku duullo
Kufriga aan dabargoyno
Aan dalkeenna ka saarro.

(Sayidka ayaa u yeeraya Fiqi Cabdi oo warqadaha u qora oo ku oranaya) :

SAYIDKA : Fiqi Cabdiyow, qalin iyo anqaas qaado oo waxaan kuu sheego qor.

(Fiqigii ayaa inta jeebka warqad dheer oo labo isugu laabaan kala soo baxa Sayidka soo hor fariisanaya, isagoo anqaastiina gacanta bidix ku wata).

*SAYIDKA :*

Ingiriis xaglo weynow
Sida xoorka uraayow
Xaaraanka beejada weynlow
Xoolo kuuma hayee
Xabbad bayna dhex taaloo

Anigoo ifka xay ah
Oon iilka laygu xabaalin
Dhulkaygood xarragooto
Xaaraan bay noqotee
Xiniinyo laysma dhibaadshee
Xifaalo waa ay dhammaataye
Xirxiroo wayga digniine

Berrito waa xarbi weyne !
Xooggaagu yaanu ku ciilin

(Markaas baa nal yar la daarayaa oo heeskan soo socda la maqlayaa).

Ma gar baa addoonsigu ?
Ma gef baa i sii daa ?
Gogoldhaaf ma xeer baa ?
Gardarradu ma libin baa ?
Geesi hooyadiisey guulayso
Fuley tii gardaadisaay gablan
Waan kula gudboon nahay
Kaa garasho **dheer nahay**
Goobta kaaga adag nahay
Kaana gacan sarraynnaa
Gabbashadu ma dirir baa ?
Gabagabo ma nabad baa ?
Guul-oon ma wabax baa ?
Gabaddano ma roob baa ?
Geesi hooyadiisey guulayso
Fule tii gardaadisaay gablan
Waan kula gudboon nahay
Kaa garsho dheer nahay
Goobta kaaga adag nahay
Kaana gacan sarreynnaa
Gubatadu ma hawd baa ?
Guubaabadu ma tookh baa ?
Dibu-gurad ma orod baa ?
Aan ku gado ma gacalaa ?
Geesi hooyadiisey guulayso
Fuley tii gardaadisaay gablan
Waan kula gudboon nahay



Kaa garasho dheernahay
Goobta kaaga adagnahay
Kaana gacansarraynnaa
Guuxyoo libaaxii
Galawgii wakaa ciyey
Xilligii isguri jirey
Gadaalaha muxuu noqon ?
Dagaal loo guddoonsaday, guureeyey
Gurdan iyo colbaa baxay, gaashaaman
Gaadiidka loo raray
Fooraha gaddoomiyo
Gawruhu muxuu noqon ?
Yaa gantaasha lagu ridi !.

*A R A G G A 10d*

*T I L M A A N T A A R A G G A :*

Miis iyo laba kursi iyo xafiiska waaliga Ingiriiska. Isagoo warqaddii Sayidka akhrinaya oo caro weyni wejigiisa ka muuqato oo marna kacaya, marna muraayado gashanaya, marna xaashidii dib u akhrinaya. Askar saddex ah buu u yeerayaa oo ku oranayaa: Aaway Cali Aadan, Aaway Jaamac, Aaway Bootaan ? :

W A A L I G A :

(marka ay soo dhoobtaan) :
Raggii aan u sameeyey
Sirta aannu u dhiibnay
Warka aan ka sugaynaye
Soo jeed aan ku ogeyn
Ma seexdeen beryahaan
Suufigii duubka lahaa
Col haddii u samaystay

See warkii igu seegay ?
Maadinkaa la safnaa ?
Ka soo jeeday dhankiisa
Anna ii sasabaayoo
Surmaseegtiyo been
Igu saabilayey ?
Saddexdaa taagan hortaydow
Haddaydnaan war i siinnin
Suganoo been laga sheegin
Surkaa laydin ka goyn !

*ASKARI : Basaas ah :*

Sir, Sarkaal, sowjar sarreeyow
Anigaa war ku siiyey
Saddexdii xalayto
Markii uu dadku seexday
Ayaan seeraha aaday
Saq aroor ku dhawaadda
Ayaan reer sabadii
Nin saaxiibkay ahaa
Saruu soo kiciyey
Suugaan baan ku waraystay
Sir iyo caadba u baaray
Su'aalo dhawrana haybshey
Wuxuu yiri Sayidkii baa
Seermaweydo halkaana
Daraawiish ka samaystoo
Subixii alla keenaba
Sagaal kun baa la qoraa
Nugulkaa sirsirrooganna
Tarahaa la suraa
Markay laabta simaane
Sarraxa ay ka kacaane



Hubka dheegga la saaree
Salaanta ay bixiyaane
Midigta sayrahayaan
Wax sidaas u socdoon
La simaan arki waayey
Sawaxanna waa ka baxaayoo
Sabtidaa Ingiriiska
Lagu saari col weynoo
Saraakiisha la laynoo
La saanyoon dumarkoodaa
Ku soo duushay dhegtayda
Xalay oo dhan ma seexan
Ilaa saaka aroortii
Waan la soo ordayoo
Su'aashaad iga boobtaye
Warkaasaan siday maanta
Seer miyaannan digniinta
Si wanaagsan u keenin ?

*WAALIGA :*
(oo Ingiriis ku hadlaya oo kacaa-fariisanaya ayaa oranaya) :

*"What kind of Sayid is that ? How come! He must be captured immediately. Great Britain should not be worried by such a mad Mullah !*
*England which has had defeated so many powerful nations !"*

Degdeg waa in askar loo qoraa. Aaway karraanigii.
(Karraanigii oo qalin iyo buug gacanta ku wata, shaar iyo surweel caadi ahna qaba ayaa soo gelaya)
U dir taar Hindiya, Cadan, Soodaan, Koofur/Afrika, Masar.
U qor. Waa in haddeer ciidan «Somaliland» la keenaa ! (This minute. I say ! ).

## A R A G G A 11d

*TILMAANTA ARAGGA*

Dagaal baa dhex maraya Ingiriiska iyo Daraawiishta. Saraakiil badan oo Ingiriis ah ayaa dhimanaya, iyagoo taahaya. kuwo Soomaali ah oo askar ah ayaa cararaya, waxaana ku jira Qaajebalas. (Daraawiishtu qoryo iyo warmo ayay ku dagaallamayaan, Ingiriiska iyo askartiisuna qoryay haystaan).

## A R A G G A 12d

*H A A T U F :*

Goobihii Afbakayle, Fardhiddin, Beerdhiga iyo Daratoole kolkii ay dhaceen oo midda hore ma ahee saddexda kale Ingiriiska lagu naafeeyey ayay dawladdii London markaas ka dhisnayd waxay goosatay in Daraawiish olole xoog leh lagu kiciyo, si ayan goor dambe lug iyo laan isula helin. Ingiriiskii wuxuu la heshiiyey Talyaaniga iyo Xabashida, labadoodaas oo ku ballan qaaday inay wixii awooddood ah dagaalkaas culus kaga qayb gelayaan. Xabashidu iyadu waxayba Jigjiga ka soo saartay ciidan dhawr kun ah oo hub leh, Ingiriiskuna ciidan buu Berbera ka soo saaray, midna wuxuu ka soo dejiyey magaalada Hobyo oo uu Keenadiid suldaan u ahaa, abbaannimada Talyaanigana ku hoos noolayd.

Dagaalkii Cagaarweyne ee Daraawiish iyo ciidammadaas faraha badan dhex maray ayaa, dabadeed, dhacay 1903dii, wuxuuna ka dhacay duleedka magaalada Gallaaddi ee haatan ka mid ah dhulka Soomaaliyeed ee ay Xabashidu ka taliso. Dagaalkaasi wuxuu, runtii, ahaa kii ugu xumaa ee Ingiriis Daraawiish kala soo gudboonaaday sidii ay iyaguba qirteen, in kastoo Imbaradooriyadda Ingriiska laga kala keenay askar badan oo aan isku ahayn, isku jinsiyad ahayn, isku diinna



ahayn. Koofurta Afrika ciidammaa laga keenay, soodaan sidoo kale, Hindiya sidoo kale, Sawaaxili sidoo kale. Ingriiska iyo askartiisii wax nabad qaba lix nin oo keliya ayaa ka noqday, Saraakiil badan oo wada caddaanana haadda ayaa loo waray. In kastoo uu Ingiriisku goobo hoog soo arkay, haddana Cagaarweyne oo kale ama Gumburo, sida dadka qaarkiis goobtaas u yaqaan, sooma ay marin, waxayna keentay in waaligii Ingiriiska ee Berberaad shaqadii laga eryo sidii isaga oo xoogga iyo dagaal aqoonta Daraawiisheed ka mas'uul ah.

TILMAANTA ARAGGA

Qaajebalas oo ordaya ayaa hadba dhan u cararaya, isagoo waran iyo gaashaan sita. Nin baa ku soo baxaya oo oranya :

DIIRIYE : war sow Qaaje maad ahayn ?
QAAJE: (Oo hoos u jeeda): war haahe, kumaad adigu ahayd?
DIIRIYE : war waa Diiriye Xiireeye xaggaad ka timid ?
QAAJE: Meelaan eeday oo aanan u noqon doonin. War soo Ingririis nama hodin oo nama oran : Daraawiishi waa baylahe geel u doonta; war sow nama oran: Hub ma leh. Sow nama oran: Fardo ma leh. Hiddi darxumo. Ilaahow waa kugu mahad haddaan lafahayga la soo baxsaday.
DIIRIYE : oo Qaajow waadigii afarreyda yiqiine maxaad goobtaas ka tiri ?

QAAJE : **Waxaan iri**

(Markaas baa la maqlayaa masafadan soo socota oo Qaaje dagaalkaas kaga warramayo).

*HAATUF :*

Raxan raadkiyo hawsha
Kamaan raalli ahayne
Rag baas bay damciyey

Rabbina weyla iraaday
Geel baanan raadi lahaa
waxba yaanan rimaydiisiyo
Ratigiisa rarooyiyo
Ramaggiisa kaxayne
Kol haddaan rubaddayda
Reerihii nabad geeyey
Rabbiyow mahaddaa!
*( Aamus yar )*
Hindigaa ridi doona
Soodaantaa rogi doonta
Yamyamkaan rinjijiirsan
Rag cad baynu u geynoo
«Reedhy» baynu ahaan
Ruqay weeye farduu
Rasaastoodu ma fiicna
Rabbigay talin maayo
Rugtoodaynu gallaa
Ninba reer ha kaxaysto
Sow wixii na hor rooraye
Raggii ay qoranaysiyo
Rogey gaalada maaha ! !

*A R A G G A 13d*

Daraawiish oo libaysan oo dabbaaldegeysa. Iyagoo si wareeg ah u taagan ayay si dhafandhaaf ah welgooyinkan u marinayaan :

*W E L G O*

1. Ninkii geesiyaa gantaasha ridee
Hubkaan ganay, gaaladuu rogey
2. Halkii laysku galo fulaa gabbadee
Hubkaan ganay gaaladuu rogay



3. Sidii ari goosmayoo bahal galay
Miyaannu u goyney gaalada
4. Garaad xumihii gafuurka caddaa
Gardaadka rasaas ma looga gubey
5. Ninkii cududlaa cayaari karee
Cagaarweyne sow ma ciil bixin
6. Allow cadcad iyo madow kiisee
Kufroo idil baan colkiis nahay.
7. Garnayl ka furtoo bar googoynoo
Libtii kala guurray gaalada.
8. Ceebaysanihii la caano dhamaan
Caloosha ka toogtey oo cunay
9. Markaan casar galay cishihii bajinnoo
Anaa calankaygu suran yahay.
10. Ninkii dembi dhaaf allihii doonow
Daraawiish dhankeeda soo aad.
11. Jahaad xaq ahaa kufriga jebiyee
Jikraan ku ridnoo janjeersade.
12. Hadday kii jeclaa jebkiis tahayoo
Jariidkaa laga uleeyaa
13. Safkii Sayidkoo san baan nahayoo
Siraadkaan uga gudbeynaa
14. Darwiishka ayaan u daacad nahoo
Dalkaan gobannimo u doonnaa
1. Halyeeyada gaalo hoojinayoo
Hubloo isku duuban baan nahay.
16. Berbera Beledkayga weeyaanoo
Nin beejo qabaa ma baarriyo
17. Berbera cadow yimid ku ceesi mayee
Caloosha ka toogta caasiga
18. Kufriga ka baxaannu leennahayoo
Hadduu wax isbido berraan geli
19. Belaayo ninkii u beer dhigayow

Darwiish buntukhiisa baal qabo.
20. Gammaan orodlaa ku gaalibayoo
Gaalada baqihii na gaarsii.

(Halkaas markii ay marayso ayaa Sayidkii soo gelayaa. Markaas buu fariisanayaa oo oranayaa) :

*SAYIDKA :*
Daraawiishey, maxaad maanta i weydiineysaan ?

*ISMAACIIL MIRE :*
Sayidii, gaalo garannaye, yaa kaloo col inoo ah ?

Yaase nabad inoo ah ?

*SAYIDKA : 1.*
Ninkaan daacad ahaynoo
Diinta xeer la lahaynoo
La dersoo gaalada raaca
Dameer ay dhigtaanoo

Dusha ay ka rartaanoo
Daabbadiisa ka iibshoo
**Soo fariista docdoodoo**
La daaweysta xumaantoo
Daraawiish la collow
Dubaaqiisa ku beeroo
Dabargooya islaankoo
Danaheennana moogoo
Sirteennii dibad geeyoo
Dariiqa toosan u leexo
**Digniin aannu ku siinnoo**
Dabadeed maqli waayoo
Dhegihii ka daboosha
Waa in kaa la dilaayoo



Deldelaad u mutaa.
*(Aamus yar)*
2. Ka kalee ah dillaalkee
Dabada rayska ku qaatee
**Dirhan uu ku dabaayo**
Dantiisa uu ku hodaayo
Ferenjigu ugu deeqee
Damac waalani qaadee
Dusdusee musuq keena
Waa in kaa la dubaayoo
Dab intaad u shiddaan
Dubku uu ka murxaa :
*(Aamus yar)*
**3. Kan kalee hog dalooshee**
Dalluun hoosta ka jeexee
Dabool xaabo ah saaree
Deda ee qarinaayee
Daraawiishta ku laa
Dabargoo isyiraa
Kaana waa in la dooxo
La dillaacsho calooshoo
Xiidmihiisa la daadsho
Isagoo labo daana
Dogobka aad ku wartaanoo
Dadkii meydka arkaa
Ha ku qaato digniine.

*XAAJI SUUDI :*
Sayidii hadduu Ferenjiga la socdo, asii uu ashahaadanayo maxaynu ka yeeli ?

*H A A T U F :*

Nin aqdaamo Ferenjiya
Maantiyo abuurriin

Ama aaladduu sida
Ama awrta buu rara
Ama ariga buu qala
Ama laba ugaarsada
Ama uba illaalaa
Ama uurka kala jira
Ashahaado beeniyo
Islaannimo ha lagu dhaqo
Ilaahayna nama oran
Anna ma oggolaan karo.

(Daraawiishta ayaa wada qaadaysa afarta meeris ee masafadan ugu dambeeya).

*ARAGGA 14d*

*TILMAANTA ARAGGA :*
*LONDON BARLAMAANKA INGIRIIS*

Miis weyn iyo kuraas hareeraha ka taal. Waxay xubnuhu wada qaaabn dharkii araggii 1d la qabey. W. Isticmaarka oo meel gaar ka fadhiya xubnaha Barlamaanka. Guddoonshaha oo kursi kuwa kale ka dheer ku fadhiya ayaa oranya :

*GUDDOONSHE :*
Hadalku waa inoo furan yahay, waxaana qaadanya W. Isticmarka oo xogwaran ka soo diyaariyey Somaliland iyo wadaadkii waallaa. W. ISTICMAARKA (oo muraayado gashanaya) :

Anigoo ah Guddoonshe
Wasiirkii Isticmaarka
Wararka ii imanaayiyo
Akhbaartaan ka helaayo
Afrika xeebta ku taaliyo
Agagaar Berberaad



Aan u yeelannay qaybta
Askartaan u dirayniyo
Bar kaloo la ijaartiyo
Ilaalo aan qorannay
Kulligood eber weeyoo
Unuunkaa laga gooyoo
Uustar baa lagu laayoo
Maadhiin baa oloshoo
Jikraa oofaha gooyey
Wadaad awliyo sheegtaa
Ummaddiiba kaxaystoo
Amarkii dawladda diidoo
Ingiriis ka xanaaqoo
Ku muquunshey awoodoo
Inoo sheegtay itaaloo
Daraawiish isu keenayoo
Ammaanduule u yeeloo
Aalad iyo hub u iibshoo

Ishii waaga salaadda
Taar aroortii la keenoo
«Manning» (1) uu ku hadlaayey
Markii aan akhriyaayey
Ulajeeddada dhuuxay
Afku wayla xumaayoo
Anigaaba argaagax
La istaagi lahaaye
Adduun baa la rabaaye
Awooddaan u dirayno
Waa in lay oggolaado.

1. *Taliye ka mid ah kuwii Ingiriiska ee Berbera Xukumi jirey bilawgii qarnigan.*

*MR. SMITH:*

Oo maynu halkaaba ka soo guurro ?
Maxaynu ka heleynaa ?
Midda kale hawlo badan oo ka waa-
weyn baa «Britain» hor yaal.

W. ISTICMAARKA : Ma filayn in Mr. Smith uu su'aasha jaadkaas ah halkan ka soo jeediyo, hase yeeshee jawaabtu waxay tahay: «Somaliland» waxay ku taallaa Badyarada Cadmeed, waana halka maraakiibteenna marin u ah oo ay ka gooshto. Waa dhul hodan ah, siiba xagga xoolaha, waxaana la og yahay in hilibka askarteenna Cadmeedi ku nooshahay halkaas looga soo dejiyo. Saldhigga Cadmeedna halis buu gelayaa. Midda kale bal malee sida ay sharafta Britain hoos ugu dhacayso haddii aynu wadaadkaas waalan uga soo baxno dhul weyn oo nin kastaaba jeclaan lahaa inuu taabo.

Mr. BEVIN : Maa lacag loo qoro oo wadaadka mushaar la siiyo sidii aynu ka yeellay kuwii Hindiya ee sidiisa mar noqday oo caasiyoobey ?

W. ISTICMAARKA : Ma dhici karto. La mid ma kuwa aad sheegeyso Mr. Bevin. Waa nin hal adag oo ciidanna maanta haysta. Bishii Febraayo sannadkii tegey ayuu warqad u soo diray waaliga Berbera oo ku yiri :

*HAATUF :*

Haddii laygu caashaqo *(1)*
Caskar iyo Maraakiib
Haddii ciidan faro badan
Laygu soo carcoorriyo
Hadday soo cabaadaan
Cadcad iyo saraakiil
Haddaad soo cafuuftaan
Ciiddaas masaalkeed

1 *Masafada oo dhan ka eeg Diiwaanka Sayidka, Sheekh Jaamac, b. 178*



Cimrigay intaan jiro
Cadow hadduusan ii turin
In kastaad carootaan
Ama aad curraaftaan
Marna inaan cabiidsamo
Caqligiinna yay gelin !.

Marka ma aha nin doonaya mushahar nabadeed inuu Berbera ku dhex qaato sida wadaaddada qaarkood. Waa nin raba inuu taliska nagala wareego, innagana badda inagu shubo.

Mr. HEATH : Mr. Chairman, haddii arrintu saas tahay waxaan idin hoga tusaalaynayaa inaan xeebta la dhaafin, dagaalna aan ninkaas waqtigan haatana lala gelin ee si siyaasad ah laysugu dayo in lagu qabto. Ciidanna ha la qoro, si weerarka xaggiisa ka yimaada Berbera iyo agaheeda loogaga caymiyo. Dawladda Ingiriisku, haddii aynu xagga khasnadda eegno, maanta kuma dhiirran karto dagaal dhab ah oo ay wadaadkaas la gasho.

(BARLAMAANKII AYAA TALADA NINKAAS U SACABBINAYA

GUDDOONSHE : (oo kacaya) : Sidaas baynu isku raacnay, fadhiguna waa xiran yahay.

## *ARAGGA 15d*

*TILMAANTA ARAGGA :*

Sayidka oo rag qusuusi ah la fadhiya (6 nin) ayuu soo gelayaa Cali Faahiye oo qaba labo go' oo cadcad iyo kabo Soomaali iyo tusbax madow).

SAYIDKA : Waa kuma ?
C A L I : Waa Ca'i Faahiye oo Qandala ka yimid.
SAYIDKA : Maxaad waddaa ?
*C A L I* :

Sayidii nabad weeyoo
Farxad baan la socdaaye
Hubna waydiin sidaayoo
Safkiinnaan gelayaaye
Bal salaamu calaykum.
Waa siinkeeda kaleetee
Sagaalkii diriroode
Safka aad u gasheene
Gaalo aad silciseene
Libta aad ka siddaane
Darwiishku saamiga qaatay
Way saamaysay adduunkoo
Saaxiley badda dheer iyo
Saraar baan ka ogaannay
Gacan baan idin siinnay
Sacab baannu garaacnay
Boqorkaase (1) saluugaye
Si kaleeto u qaataye
Talyaani bay sed wadaag iyo
Saaxiib ay ku noqdeene
Waxaan kuula socdaa
Saaka waa tegayaaye
Soo noqodkayga labaad

1. *Boqor Cismaan*

Sumucii qorigii iyo
Markaan saanadda keeno
In dagaalku socdaayoo



Sidii aan u wadnaaye
Sayidii iga yeel.

*SAYIDKA :*

Caliyow, belaayo gacanteed haddaad ka baxdo laguma noqdo, aniga iyo Daraawiishna inaad intaas noo dhaafto ma aan jeclin.

*CALI :*

Sayidii waan soo noqonayaa, hub inta ka badan oo aynu ku dagaal galno ayaan inoo doonayaa.

*SAYIDKA :*

Waa tahay, ha moogaan cadowgaaga,ha hilmaamin ballanteenna, ha ku raagin sodcaalka.

*A R A G G A 16d*

*H A A T U F :*

Cali Faahiye Geeddi oo Darwiishnimo ku beerantay, si weynna u jidbeysan ayaa ku laabtay Magaaladiisiii Qandala, si uu xeebahaas hub iyo rasaas Sayidka ugaga soo iibsho. Intii uu Daraawiish ku soo maqnaa ayuu Boqorkii la oran jirey Cismaan Maxamuud oggolaaday heshiiskii abbaannimada Talyaaniga ee uu Dotoor PESTALOZZA ula yimid; kaas oo ahaa Qunsulkii Talyaaniga Cadan, xeebaha bari iyo Koofurta Soomaaliya wakiilka uga ahaa. Cali Faahiye yaab baa alle ku riday kolkuu arkay calankii Talyaaniga oo ka dul babbanaya gurigii aabbihiis magaaladaas ku lahaa. Markaas buu inta is-hayn waayey soo dejiyey oo afar cad ka dhigay, dabadeedna dab suray. Maalintaas laga bilaabo waxaa lagu naynaasi jirey "Calan gube". Maxaa ka dambeeyey ?

*TILMAANTA ARAGGA :*

Cali Faahiye oo Qandala dhex maraya. Wuxuu arkayaa calankii Talyaaniga oo guri dul suran. Intuu ku ordo ayuu

calankii soo dejinayaa oo ula imanayaa Boqor Cismaan oo ku fadhiya kursi dheer, qabana khamiis midabbo leh, bakoorad qurxoon gacanta ku haysta oo gambar caguhu u saaran yihiin.

*CALI FAAHIYE :*

Adigoo boqoroo
U sarreeya bahdaayoo
Bilaadkaan xukumaaya
See bandiirad Talyaani
Dabayshu ay babbinayso
Beydkaaga loogu xiraa
*( Aamus yar )*
Ba' kaleetana waa
Xaqa waa la bilaaye
Baaddilka waa la dunshaaye
Beenta waa la nacaaye
Bishimahaaga runtaa
Looga baaq weriyaaye
Sayidkaa barakaysane
Kufrigoo u bedbaadsho
Beerjacaylna ku eego
Naxariisna u booqdo
Billaahuu ka maree
Adigii boqranaayee
Badweyntaa dhinac haystey
Gaalada beejada weyn
Bal maxawla bahawdey ?

*BOQOR CISMAAN .*

Ayadoon Bisinka
Ilaahee barakaysan
Bushimaha looga dhawaaqin
Neef haddii la bireeyo
Baqti, weeye Calow e



Geedka weyne ballaarane
Berdahaa mirihiisana
Calooshooda nin baaray
Inkastoo baahiyi hayso
Bal ogow cuni waaye
Arrintaan la bislayne
Birqinka aan laga dhawrine
Bartanka looga dhacaana
Waa balaayo adduun
Sidaadaas ninka bayr lee
Aan baxnaanin dantiisee
Hadba meel un ku boodaa
Isagoo babbanaayuu
Libaax baydkii galaaye
Ma haddaa boqorkii
Caawa kaa baxsan waayey !
Bayd - go'aaga Calow
Ma haddaad Bastaloosi
Calankiisi billaaye
Dabayshu ay babbinaysee
Baddaan aan ku heshiinney
In balaayo xijaab
Dadka aan ugu baannoo
Buruud leh uu ku ahaado
Intaad baarka ka laacday
Ba'aaga aad kala jeexday
*( Aamus yar )*
Ma beryaad ku maqnaydoo
Wadaadkii beenta badnaabaa
Biyihii ku waraabshey
Hirka booddada dheer leh
Butaacaaya dhexdiisa

Dabaasha waa la bartaaye
Sida looga baxaayo
Adoon baabka aqoon
Baddan aad isku tuurtay
Ciddii kaa bixin layd
Biciidka jooga Nugaal
Bal soo haybi calow.

BOQOR CISMAAN (oo kursiga inta ka dega istaagaya) (Cali wuu baxayaa, isagoo boqorka shaki ku eegaya. Markaas baa waxa soo gelaya PESTALOZZA oo qaba surweel madow, shaati cad iyo niigtayn, iyo dhawr gaal oo la socota. Boqorkii oo halkii fadhiya ayay u imanayaan).

PESTALOZZA (oo la hadlaya boqorka) : Waxa la ii sheegayaa in nin la yiraahdo Cali Faahiye oo dadkaaga ahi uu calankii Talyaaniga meel halkeer ah dab ku suray. Dawladda Boqortooyada Itaaliya waxay taas u qaadanaysaa xumaan aan geed loogu soo gabban. Kolka, waxaan kaa rabaa, anoo ku hadlaya magaca dalka iyo madaxda Talyaaniga in ninkaas si degdeg ah gacanta la iigu soo geliyo. Haddii kale, boqorow, waxaan u qaadanayaa inaad adiguna kula jirto, markaasna waxaannu dan moodno baannu yeelaynaaye, ogaanteed lahaw !

BOQOR CISMAAN : Signor PESTALOZZA, waxaad ka welweshaa ma jiraan. Cali Faahiye waxa uu sameeyey waa wax labadeennaba taabanaya; maxaa yeelay adna calankaagii buu gubay, anna magantaydii yuu ii gacan dhaafay ee ma aha wax kugu gaar ah. Midda kale, haddeer baan ku guddoonsiine sidaad ka yeelaysaa adigay ku jirtaa!

(Boqorku markaas buu Cali Fahiye u yeerayaa oo PESTALOZZA guddoonsiinayaa. Ragga Qunsulka la socda ayaa meesha ku jeebbaynaya, in kastoo u isku deyayo inuu giririfleeyo).





*H A A T U F :*

Dagaalkii Daraawiisheed kolkii uu lix sano socdey, kolkii goobo ba'ba'ani dhaceen oo Ingiriis rag iyo maalba kaga dhammaadeen kolkii dawladdii London ay u adkaysan weydey kharashkii la dagaallankii Sayidka ugu baxayey ayay Ingiriiska iyo Talyaaniguba ku heshiiyeen inay xeelad kale oo aan iska hor imaad ahayn wax ku farsameeyaan. «Maamuuska iyo madaxnimada xagga diinta aynu ka galno oo aynu weysiinno kalsoonida buuxda ee uu ka haysto kumanyaalka Daraawiishta ah ee raacsan» ayay isyiraahdeen oo ay talo ugu dhammaatay labadaas dawladood iyo Soomaalidii kale ee Sayidka dhaqdhaqaaqiisa ku kacsanayd. Cabdalla Shixiri oo markii hore gacanta midig ee Sayidka ahaa, Cadanna u joogi jirey, dabadeedna ku balln furay ayaa Ingiriisku cawaansaday oo u qurxiyey inuu Maka aado oo uu Shiikh Maxamad Saalax Sayidka ku diro, kuna yiraahdo, "Ina Cabdille Xasan, wadaadkii aad Dariiqada siisay, dadkii dhammee, magacaaguuna ku dagaal galaa oo xoolaha islaanka ku dhacaa" Sidaas buu Ina-shixiri oggolaaday, isagoo isna odayaal kale sii taxaabtay oo Cadan iyo Soomaaliyaba ka kaxaystay. Waxaa la weriyey inuu Shiikh Maxamad Saalax Sayidka u soo diray warqad waano iyo waxusheeg u badan oo aan innaba wax ceebayn ahi ku jirin, hase ahaatee ina Shixiri, kolkii ay taasi u dhadhami weydey oo uu oggaday inaan danta ragga uu ka socdaa ku jirin ayuu diyaarsaday warqad kale oo Sayid Maxamad ceebaynaysa, inuu islaanka jidkiisa ka leexdayna ku tilmaamaysa. Karraanigii Sheekha ayaa laaluush la siiyey oo la weydiistey inuu kaatunka Sheekha warqaddaas dib laga sameeyey uu ku dhufto, isna taas waa yeelay. Warqaddii baa kolkaas inta Cadan la keenay la badiyey oo markab lagaga soo qaaday, dabadeedna Ilig oo Daraawiishi markaas degganayd laga soo tuuray. Warqaddaasi waxay

sabab u noqotay khalkhalkii ururka Daraawiisheed la soo gudboonaaday kii ugu xumaa, waxaana ka dhalatay fadeexaddii taariikhda ku gshay "Canjeel-talawaa".

*TILMAANTA ARAGGA :*

Sayid Maxamad oo warad weyn oo carabi ku qorn gacanta ku haya oo Daraawiish badani geesaha ka fadhido qaarna taagan yihiin. Sayidka caro iyo yaab baa wejigiisa ka muuqda. Intuu kaco ayuu oranayaa :

*SAYIDKA :*

Daraawiishey, warqad yaab leh oo Maka laga soo qoray ayaa xalay cishihii dabadiis lay guddoonsiiyey. Waa warqad iga yaabisaye bal idinna dhegeysta. Xuseenow, akhri oo kor ugu dhccrayso maandhow.

*XUSEEN :*

(ka dib markuu sheego inay Shiikh Maxamad Saalax ka timid)

Waxaan dhambaalkayga ka bilaabayaa salaan, cimridhererna waan kuugu ducaynayaa. Ilaahay ha ku dhawro. Waan maqlay inaad tahay nin dhulkiisa u taagan oo cadawga gaalada ah la-dagaallankooda u go'doomay. Hadalkuna sidiisaba waa dhuux ama waa wax aan dux lahayne, waxaan kuu haystaa inaad, isla markaas tahay, nin diintii islaamka dhinac ka maray, nin dadka in la mooraduugo banneeyey, nin ummadda dhiiggeeda xalaashaday. Muslin qumman ma tihid, gaal caddaystayna kuguma sheegi karo !. Waan yaabsanahaye, ma u dhexaysaa ? !.

Yaa kuu fasaxay inaad magac dheer la baxdo ? Yaa kuu oggolaaday inaad «Sayid» isku magacawdo ? Intaas waxaa ka daran oo la ii sheegay inaad dhisatay dumar rag kale u dhaxey, dabadeedna la aqal gashay !. Sharcigeennii



dhignaa waad ka ilduuftay, waddadii habboonayd habaw baa kaa leexshey, dhewaaqii Nebi Maxamadna waa iska dhego tirtay!.

Hadda iyo dan, aniga iyo adiga maantaa isugu keen dambaysa, dhambaal dambe kuu soo diri maayo, adigana kaa sugi maayo. Dariiqada Saalixiya dibadda ayaad ka tahay, wax dambe oo aad ku darsataana ma ay jiraan. Waan kaa saaray, haddaan anigu madax u ahay. Waxaase iga waano ah: Haddii aadan dhaca dadka iyo dilkooda iska dhaafin waxaad ogaataa dharaarta Qiyaamaha in dhuxul naareed lagu huwin doono oo aan Ilaah qooqaaga u dul qaadan doonin. Midda kale, waxaad ogaataa haddii aadan waxa aad ku jirto soohdin u yeelin inaan, aniguna, dhammaan muslimiinta adduuka ka dhaadhicin doono waxa aad ku kacayso iyo qaska aad dhulka gelisay oo aan giddigood u bandhigi doono. ka ku naceene !.

*(Shiikh Maxamad Saalax)*
*Maka*

(Daraawiishtu inta xaashida la akhriyayo hoos bay isula hadlayaan, qaarna Sayidka iyo ninka warqadda akhriyayay ayay eegayaan). Markaas baa Sayidku inta kaco oranayaa:

*SAYIDKA :*

Daraawiishey, xaashida horaan u akhriyey, haddana idinkaan idin tusayey dibindaabyada iyo shirqoolka ay gaalo iyo cawaankeed inagu hayaan. Haw dheg taagina, waa ina Shixiri iyo camalladiisiiye.

*XAAJI SUUDI :*

maxaad taas ka leedahay ?

*SAYIDKA :*

Waxaan ka leeyahay :

*HAATUF :* *(1)*

Nin Ilaah yaqaan oo sharciga, ku isticmaalaaya
Ashahaado loo qoray nimaan, kala illaaweynin
Oo aan inkirahayn xaq waa, la oggolaadaaye
Nin salaadda awqaadda faral, u addimoonaaya
Oo dagada oofinahayoo, ugubka dhiibaaya
Oo aan afurin soonku waa bilaha iideede
Adduunyadiyo xoolaha ninkii, aragti dhiibaaya
Oo inuu oheeyey! yiraa, ka istixyoonaaya
Oo aan bakhaylnimo abkiis, lagu ishaaraynin
Nimaan diinta aafo u geleyn, aakhiruu sebenka
Oo aan Amxaarada sidii, obo u yaacaynin
Oo aan ardiga beesadeed, u ashtakooneynin
Nimaan abuurka Soomaaliyeed, ka anfi taageynin
Oo aan ajuurada Kufriga, ugu adeegeynin
Oo aan ardiga beesadeeda, u ashtakooneynin
Nin jahaad ohoominahayoo, ubaxa loo saaray
Ingiriiska eyga ah ninkii, ugu uneexaaya
Oo libin ajri leh soo heloo, or iyo geeraar leh
Nimanyahow aqoonxumadu, waa ardaalnimo e
Asaraar ma fiicnee run baa, lagu arooraaye
Ninkii aynigaa lagu yaqaan, saw islaan ma aha!

*A R A G G A 18d*

Geed weyn hoostii rag badan oo Daraawiish ah oo fadhiya. Giddigood dhulka ayay wada xarriiqayaan oo shaki baa ka muuqda. Mid baa kacaya oo oranaya:

*1. Tixda oo dhan ka eeg Diiwaanka Sayidka, Sheekh Jaamac, b. 10*

*Aadan Cawl :*

Ragow warqaddii waad maqasheen, wixii wadaadku raaciyeyna waad u wada joogteene, maxaad ka oranaysaan ?

*Faarax M. Sugulle*



Haddii xaajo ragaaddo
Ribbatoo socon weydo
Hadba meel isku raarto
Ruugcaddaa la tusaaye
Taladaan rogman weydey
Raabaha raabaha fuulay
Rinjijiir kicinteeda
Ragow yaa ka hadlaaya ?

HAATUF: Allow sahal libaax seexday bay niman salaaxeene!)

*Axmad Fiqi*

Anigu aan runta sheegoo
Rogrogoo kala saaroo
Riddada aan ku hagaajoo
Ra'yigayga abbaaree
Daraawiishta rugteediyo
Wadaadkaa raxraxdiisiyo
Hadba meel isku raarkiyo
Rakadaa ka deg fuul iyo
Rabashkaa demi waayey
Intaynaan wada riiqmin
Shiikha aan rubad goyno
Ruugba ruug aan u saarro
Lafihiisa rigaaxno
Ninku waa na rigaystaye
Maysagaa rabbigeena ?

HAATUF : Allow sahal libaax seexday bay niman salaaxeene).

*Cabdille Qoryow*

Aniguna ra'yigayga
Ninba waa riddadiisee
Aan markayga ritee

Wadaadkaa ruugagga weyn loo
Daraawiishta rigeystoo
Nagu haysta rafaadka
Sida awrka rarooyo
Ragaadoo socon waayey
Rash intaynu ka siinno
Jare aan ku rabbayno
Maynu raarka ka qaadno
Maysagaa ah Rasuul
Wadaadkuu la rafiiiqayba
Waa kaa ceebaha raacshee
Muxuu noogu rablayn!
Maynagaan rag ahayn ?

HAATUF : Allow sahal libaax seexday bay niman salaaxe-ene).

*Faarax M. Sugulle*

Rag hadduu tashanaayo
Ninba waa ra'yigiisee
Mid kalaygala roon
Intii aan ridi layne
Aan riddaamin lahayne
Wadaadka riijin lahayne
Rafaad uu dhici laaye
Lays rigaaxi lahaa
Waa intaasoo rag kaleeto
Ruuxu uu ka baxaaye
Rabbina dhiigga Islaanka
Rubad - gooyo ku dhaata
Rasuulka nooguma sheegine
Waa intaasoo roob la waayoo
Daruurtu ay ribbataaye



Ramaas soo bixi waayee
Waxba yaynan ku raynin
Indhahoon ka ridnaaye
Ninb areed ha ka dhaafo
Yaan la joogin rugtiisa
Rabtaas aan ka carrawno!

HAATUF : Allow sahal libaax seexday bay niman salaaxe-ene)

(Markaas baa la kacayaa, iyadoo ninkaas dambe taladiisa loo guuxay), Shire-Cunbaal inta la tashanayo geesuhuu ee-geegayaa, marka la baxana halkaas ayuu ragga cabbaar kaga dambaynayaa.

## *A R A G G A 19d*

*TILMAANTA ARAGGA :*

Sayid Maxamad iyo Shiikh Cabdille oo wada fadhiya (labaduba kolka daaha la furo ayay duubka dhiganayaan horto-oda). Shire-cunbaal ayaa u soo gelaya isagoo tallaabo cabsiyeed ku soconaya. Sayidkaa inta kor fiiriya oranaya :

*SAYIDKA :*

War sow Shire ma aha ? War Shire-cunbaal maxaad waddaa ?

*SHIRE :*

Sayidii, rag baa shiray !

*SAYIDKA :*

Oo maxay ka shireen ?

*SHIRE :*

(aamus cabbaar ah ka dib): Wax daran iyo waxay dabar leh!

*SAYIDKA :*

Ma Daraawiish baa, mase waa gaalo ?

*SHIRE :*

Sayidii, ma aqaan, Daraawiish bayse sheegan jireen.

*SAYIDKA :*

Warka i sii, yaa u madax ahaa ? Yaa hadlayey ? Yaase ka war gurayey ?

*SHIRE :*

Faarax Maxamad Sugulle baa hormuud isaga dhigayey, Aadan-Cawlna waa ka war gurayey. Saddex talo ayaa laysla soo qaaday. Aan Sayidka dilno rag baa lahaa, aan xirno oo sida wadaaddada kale u dewarro rag baa lahaa, waxayse ku dhammaatay in Xaranta laga guuro oo laguu banneeyo, Daraawiishna ku kala tagto.

*SAYIDKA :*

Duco san baan kuu akhrinayaa, Suudiyow soo fariiso oo in yar i dhegeyso.

*HAATUF :* *(1)*

War suudow sedkaa waa jaanne samac kalaankayga
Salaama alla yeelyow adaan saakin kuu ahaye
Sowdkaan ku leeyahay yuu salabka kaa raacin.
Sonkor iyo sarreen malable iyo sixin ku iidaaman
Xeeryaha sanuunadan barndia lagu sibbaakhaayo
Sulux caana geel sogob la qalay, sarara geedeysan
Sareedada raggii aan u waday, saadka iyo quudka
Saqda dhexe habeenkii raggaan, sahay u geynaayey
Kuwiii aan sibbaaraayey baa saatan ii galaye
Salaaddiinta nimankaan qoree, sare u qaadaayey
Raggii sidigta geela hayey oo, suuska beeganaayey
Nimankaan siday doonayaan, sahal u yeelaayay



Nimankaan sariira u dhisee, soohdinta u jeexay
Surradda iyo dadabtii raggaan, saari ugu goodey
Gabdha wada saruurada raggaan, sowjad uga yeelay
Nimankaan salaaxanahayee, saxar ka eegaayey
Nimankaan siraayada col iyo, saha ka dhawraayey
Nimankaan saqiir iyo kabiir, sama u miiraayey
Sidka boqola soof badan raggaan, saami uga yeelay
Soogaan darmaan iyo raggaan, salabaduu dhiibay

1. *Gabayga oo dhan ka akhriso Diiwaanka Sayidka, Sheekh Jaamac, b. 141*

Nimankaan sangootida fardaa, siiya oranaayey
Raggaan sumuca maadhiina iyo, saanadda u buuxshay
Nimankaan salaaddiyo u dhigay, subacyadii diinta
Sallallaahu nebigii raggaan, saamax uga doonay
Nimankaan sokeeyaha bidiyo, siiro iyo aamin
Sarsarkooda nimankaan degiyo, suuqa gurigooda
Saxariiraday igu faleen, waa sahwiyayaaye
Nimanyahw si daran baa qalbigu, ii saddamayaaye
Sokeeyiyo xigaalaanan sugin, saaca maantaaye
Soomaali oo idili way, sun iyo daybaaqe
Sullankood - la - naar iyo gun iyo, saaruqyay helaye
Sinjidhaannadii bay khatalay, saanjiga ahaaye
Oo waa seediyaashay wexeer, saatan ii galaye
Saro nama dhex ool Faarixii seerigaa xulaye
Ibleys baa sallaan kala degoo, saaxilkuu diraye
Sucdi haddii u leeyahay kufriga, uma sujuudeene
Subeerrey noqdeen wiilashaan, saakullayn jiraye
Kolkaan anigu saafi u noqday, sir ila dooneene
Sankuneefle oo idili, way saa, ilahayaaye
Nin kaleba salaaf hayla galo, sarada ceebeede
Sugi maynin Qoriyow inuu, suuqayo ii tumane

Sakaar waxaan u gooyiyo waxaan, sama u daadshaaba
Axmad-Fiqi sawaab kagama helin, sadaqaddaydiiye
Sannahaabadiisaanan abid, seexan kari hayne
Saniciisa baas iyo hadduu, saxalku ii keenay
Subaac qooqan baa iigu yimid, sabada ciideede
Inuu Ferenji ii soo sawiray, waw su'aal qabaye
Subbeehigu wuxuu igu khatalay, saahid baan ahaye !
Safiihnimadu waatuu dorraad, gaal u saacidaye
Soddon jeer ka badan ceeb intuu, saancadduu falaye
Markaan sebi ahaa iyo haddaan, suurad oday yeeshay
Saamaa Ilaah iiga dhigay, saaxir ii colahe
Saaxiibkii aan yeeshaaba, waa sayma lagu reebye
Mar haddaanu sebenkeer nafluhu, saafi noqonaynin
Waxba yaanan sida saar nin qaba, selelin goorteere
Ilaahow adaan kuu samree, suubbi taladayda !

*ARAGGA 20d*

HAATUF: 1904tii kolkii uu dhacay dagaalkii kharaaraa ee Daraawiish lagu jebiyey, loona yiqiin Jidbaale waa tii Sayidka iyo Daraawiishi sodcaalkoodii dheeraa bari iyo Boqor Cismaan ku aadeen, si ay garab iyo gaashaan uga helaan oo ay dagaalka gaalada iyo jahaadka uga qayb geliyaan. Labo bilood ku dhowaad markii ay sii geeddi ahaayeen oo faras qooragoo ah iyo hal daan dheer ah moovaane wax kale idlaadeen waa tii Ingiriisku ka war helay oo Boqor Cismaan u sheegay inuu badda ka oodi doono haddii uu wax xiriir ah Sayid Maxamad la yeesho. Boqor Cismaan inta uu baqay waa kii Daraawiish ku yiri, "Naga noqda, waxaan dagaal ahayn naga heli maysaane!" Daraawiish oo jilicsani waa tii soo rogmatay oo xeebta Ayl shalmadda dhigtay. Sayidku kolkii uu maqlay in Cali Faahiye la qabtay ayuu warqad u diray Qunsulkii Talyaaniga ee Caluula fadhiyey. Talyaaniguna, sida Ingiriiska ayuu qabey inaysan suuragal ahayn in Sayidka heshiis lala saxiixdo, sidaas aawadeedna aad buu ugu farxay warqaddaas martiqaadka ah ee Sayidka uga timid.



Qunsulkii Talyaaniga ayaa Ayl u soo raacay markab uu ku jirey Cali Faahiye oo maxbuus ahaan Xamar loogu soo wadey. Markii uu markabkii xeebtii Daraawiisheed soo dhigtay ayaa nin Soomaali ah oo shaqaalaha markabka ka mid ahi Daraawiishta u tebiyey in Cali Faahiye markabka ku dul qabbiran yahay. Nimankii Talyaaniga ahaa iyo Sayidka intaan wada hadalba u bilaabmin ayaa Sayidka warkii u dusay. Maxaa ku xigey ?

*TILMAANTA ARAGGA :*

Sayid Maxamad iyo Daraawiish soddomeeyo ah oo wareeg u fadhiya Sayidkuna dhexdooda madaxa ruxayo. Daraawiishta hubkoodu waa u dhan yahay giddina shakadaa u xiran. Wiilal yaryar ayaa meel dambe hubka dagaalka lagu barayaa. Markaas baa Abshir Dhoorre oo gaar ahaa soo gelayaa oo oranayaa :

*Abshir Dhoorre :*

Sayidii gaalaa kadinka joogta.

*SAYIDKA :*

(inta hoos u jeestoo); Soo daa, waa PESTALOOSIYE. (PESTALOZZA iyo gaaladii kale markay soo galaan ayuu oranayaa :)

*PESTALOZZA :*

Sayidow hadalkayga
Sadarkawgu horreeya
Waa salaamad xaggaaga
*(Aamus yar)*
Waxaan ahay nin sarkaaloo

Dawladi soo diratoo
U wakiila sirteedoo
La yiraaho Siyaasi
Soomaalida waddankeediyo
Cadantaa u sarreeyoo
Ka sokow calankaygana
Safka reer Ingiriis iyo
Suldaankii Cali Yuusuf
Boqorka saaka Caluula
Saldhiggiisu ahaa iyo
Cismaan baa i xilsaaroo
Ayana waan ka socdaa
*( Aamus yar )*
Sodcaalkayga agtaada
Waxa saaka i keenay
Nabadi waa sed barwaaqee
Seermaweydo heshiise
In guddoon la saxiixo
Samaan aan kala gaarro
Hawl dhexdeenna ku saabsan
Isa seeg mar dambeeto
Ra'yigaa ka sal gaarro
Adna aan lagu seeminoo
Lagaa soocin dadkaas
Uu Talyaani wax siiyo
Sidaana aan ku dhammayno
Ayaan kuula socdaaye
Saa maxaad ka qabtaa ?

Sayidku awel oo dhan hoos buu u jeedaye intuu madaxa kor u qaado ayuu oranayaa :
*SAYIDKA :*
Cali Faahiye Geeddi ma waddaa ?



PESTALOZZA (oo geesaha dhuganaya) :
Cali waa nin dembaaboo
Dawladi dawlad u dhiibtoo
Xabsi buu ku dambeeyey
Isaga daa hadalkiisoo
Aan danteenna dhammayno.

*SAYIDKA :*
Cali Fahiye Geeddi ilaa la keeno danteennu dhamaan mayso adna halkaan baad ku raagi. Daraawiishey gaalada wax tusa.

Markaas bay bilaabayaan dhoollatusad iyo gooddi)
PESTALOZZA (oo naxsan): Ma jirtaa diin dhigaysaa in ergo wax la yeelo haddaad aqoonteeda leedihiin ?
*SAYIDKA :*
Ergadii gar daran waajibkoodaa la mariyaa, waxna waa la yeeli karaa, idinkuna Cali Faahiyaad ka gar daran tihiin, ma keenteen ? Mase waad diiddeen ?
(Raggii PESTALOZZA la socday ayaa Cali doonaya).

Waxa bilaabanaya quruurux yaryar oo ay Daraawiishtu si qarsoodi ah gaalka ugu soo ganayso. "Hig, "Hig, buu leeyahay. Markaas baa Sayidku oranayaa :
*SAYIDKA :*
Maxaa kugu dhacaye aad la hingoonaysaa ? Ma neef baad qabtaa ?

PESTALOZZA : Maya, Sayidkow, Daraawiishtaannu yare kaftamaynaa.

( Sayidkaa Daraawiishta gacanta «Joojiya» ugu haadinaya ). Markii Cali la keeno oo Sayidka la ag fariisiyo ayaa PESTALOZZA soo bixinayaa warqaddii heshiiska oo la saxiixayaa. Markaas baa Sayidku oranayaa :

Heshiiskaa la saxiixday
Hadalkaan ka gun gaarney
Haybaddaan isa siinnay
Maaha ii noqo hoorri
Hacoo aan xakameeyo
Dhan walbana u hoggaansho
Boqorrodaad la heshiisayoo
Talyan heeryada saarto
Ha u qaadan sidaas
Waxa weeye heshiisku
Ha imaannin dalkayga
Halkaa aan kala joogno
Nabad wayska hellaaye
Ayaan laysku hallaabin
*( Aamus yar )*
Hadday taa noqon weydana
Waxaan ahay nin halyeeyoo
Daraawiishta hoggaanshoo
Hub iyo ciidanba haystoo
Horweynkiis dhalay maaloo
Ninna hoo aan ka doonin
Heegganoo u diyaaroo
Cadawgiisa hor joogoo
Ingiriis huluq weyne
Hoogayey uga siiyoo
Ilmiyo hayr kaga keenoo
Weli sii hibanaaya
Inuu hawdka ka saaree
Ha hilmaamin middaase
Hiyigaaga ku hayso.
*( Aamus yar )*
Hal kaleetana waa



Hunguri maahi nin raaca
Hawo maahi nin doona
Haween maahi nin yeesha
nin habaabana maahi
Intaan hooska adduunka
Nafta haysta xuntaa
Qabrina laygu hogeynin
Tuug dhulkayga halleeyaa
Waa waxaan la helaynin
Sakaraadka hinraagga
Intuu qaarka horeeto
Hiqhiqleeyahay ruuxu
Sida kaad hibanaysiyo
Hoorrigii Cali Yuusuf
Dhalanteed i habowshiyo
Hambo laygu sabaa
Habeen kaa tegey weeyee
Waa inaad ka hartaa
Horaa laygala quustee
Liirada aad u hagoogtaye
Inaan ey la hal maalo
Taa ha iila imaannin.

*A R A G G A 21d*

*TILMAANTA ARAGGA :*

Sayidkii iyo Xaaji Suudi oo fadhiya ayaa waxa u soo gelaya lix Daraawiish ah oo nin gacmo xiran wada. Kolka la keeno ayaa duubka laga xayuubsanayaa, waxayna ku welgoonayaan :

1. Ninkii ku cirraystay diintatanoo
   Canjeel u faqow cadaab mudo !

2. Daraawiish danteeda kii dumiyow
   Xaggeed naf u doonan waa dile.

3. Raggii xanta iyo xumaan u faqoo
   Xirxiran mo u keennay Xaajiga !!

Sayidku kolka ay soo hor istaagaan ayuu oranayaa :

*SAYIDKA :*

War waa kuma ninka aad waddaan ?

*Ismaciil Mire*

Aabbe Sayidii waa Diiriye. Waa raggii Canjeel-talawaa.

*SAYIDKA :*

Hortayda ka kaxeeya. Iga qariya foolkiisa; foolkiisu ha gubtee !

(Ninkii baa durbadiiba la taxaabayaa).

*XAAJI SUUDI :*

Aabbe Sayidii, sow ninka garan maysid ? Waa Diiriye. Afbakayle wuu ku jiray. Cagaarweyne wuxuu ahaa ninkii danabbada gaalada cayntaarshey. Wuxuu ahaa girligaankoodii ninkii inoo soo meeriyey. Sayidii, waa geesii goobihii Berdhiga iyo Daratoole saraakiisha Ingiriiska afka cidda u dhigay. Jidbaale saddex wiil oo wada hanaqaaday oo uu dhalay ayaa lagu jaray, isna waa lagu dhaawacay. Sayidii, adigaa garanaaya, anigase in la dilaa ilama habboona maxaa yeelay ka maarmi mayno.

*SAYIDKA :*

HMM...HMMM..HMMM... (3jeer) Suudiyow, Suudiyow, Suudiyow, sow kuma ay soo gaarin qisadii iyo dardaarankii Cumar Bin Khaddaab ? ! Caku Caamo ! Caku Caamo ! War sow kii Cumar — Allaha u naxariistee — yiri maaha kolkii uu muslimiinta la dardaarmayey:



"Lix hebel haddaad tihiin idinkaa xil idinka saaran yahay doorashada Khaliifada i dhaxli doona. Shani hadday talo isku raacdo oo midi diido kow uga siiya. Afar hadday talo isku raado oo labo diiddo, labadoodaba kow uga siiya. Saddex iyo saddex haddaad noqotaan oo ay arrini ribbato wiilkayga Cabdullahi u yeerta, isagaa idin kala saariye. Meesha uu raaco talo haydin kugu dhammaato. Qoladuu afar ku noqdo saddexda raaci weyda dhegta dhiigga u dara, say khilaaf bay wadaane !" Marka, Suudiyow, hebellada Cumar in la dilo fasaxay waa asxaabtii Nebiga. Waa raggii Beder, waa raggii dagaalladii Islaanka guusha ka keenay. Ma kuwaasuu ka falli badan yahay ? Khilaaf ninkii keena oo urur jahaad u dhisan damca inuu fadqalallo geliyo waxaan dil ahayn ma mudna. Haw jiir nixin Suudiyow, haw jiir nixin. Haw jeefaafin yaadan la mid noqone !.... Yaa Cumar ka caaddilsanaa ? (2jeer). Ninkii naga maarma waa ka maarannaa.

(Xabbad dhacday baa la maqlayaa. Markaas baa la maqlayaa heeskaan soo socda, iyadoo Sayidka iyo Suudiba fadhiyaan):

Ma raggaan carbinayee
Coodka iyo xoolaha
Caynba cayn u siiyee
U calool furraayeen
Cashiiirada u filayaa
    Ii loogey cadawgoo
    Caqli midaan lahayn
    Caabuq iila kaashaday
    La colloobay diintii
Caku nolosha qaarkeed
Ilayn doqontu ceebtiyo
Caray libinta mooddaa !
    Ma raggaan colaaddiyo
    Waran caaradiis iyo

Ciiriiga u diidee
Cadradaha u mehershee
Cududda uga xirayee
Calafna ugu daray baa
Cirba taagle iyo kibir
Canjeel iigu faqay shalay
Kufri ii cawaansaday !
Caku nolosha qaarkeed
Illayn doqontu ceebtiyo
Caray libinta mooddaa !
Cosobkiyo Barwaaqada
Calcalyada xareeda ah
Dhulkiisaas casiiska ah
Gaal ninka uga cararaa
Wuxuu geli cadaabtee
Miyaan ciidda loo dhalin
Miyaan caano lagu habin
Ma dhulkaan caruur korin
Bal muxuu ku caasiyey !
Caku nolosha qaarkeed
Illayn doqontu ceebtiyo
Caray libinta moodaa !

*A R A G G A 22d*

*TILMAANTA ARAGGA :*

Daraawiish shirsan oo taagtaagan, hubna wada haysata.

Sayidku lama joogo, Waxa soo gelaya Abshir Dhoorre oo farriin Sayidku u soo dhiibay u wada.

*Abshir Dhoorre*

Meeye ammaanduuleyaashii
Sayidkiyo odayaashii



Garwadihii arrinteenna
Waxay saaka aroortii
Ku keeneen afti buuxda
In kastoo anfariir iyo
Inqilaab dhicisoobey
Ka aloosmay dhexdeenna
Waa inaan la illaawin
Ololihiisa jahaadkoo
Mar tobnaad ambaqaadnee
*( Aamus yar )*
Afar jaad isu qaybsha
Qaar ha ahaado Hobyoo
Waa ilaalo korjooge
Ha soo eego wax yaalla
Qaar Boosaaso ah aadoo
Boqorkii ibtiloobee
Eyda gaalada raacay
Wixii uu ambaqaaday
Sirtiisoo urursan
Ha noo keeno ayaan dhow
Inna reer Berberaad
Ingiriisku dhulkaas
Uu afduubka ku haysto
Siduu yeelay ammaankiyo
Halkay gaadhay awooddi
Ha ka keento akhbaar
Eegidaa u kacaysana
Ismaaciil ha kaxaysto
Inta ooshaye joogta
Xarunta haysku arkeenoo
Dagaal loo ololeeyiyo
Aaladdiisa jahaadka
Xeelad haw igmadeen

Afartan aan ku jiraana
Agagaarka Burcaad
Oodweynaha shishadiisay
Kormeeraan la ogeyn
Ku soo eegahayaan.

(Kolkaas baa korjoogihii dhaqaaqayaa. Xuseen-dhiqle baa soo gelaya oo oranaya) :

Hoy bal jooga. Farriin Sayid baan wadaa. Masafaa soo baxday. Dhegeystta oo iyada ku dhaqaaqa.

*HAATUF :* *(1)*

Doodna waxaan u leeyahay, culimada dafaarka ah
War an idin ma doocine, idinkaygu diimaye
Dalkaad iibiseen baa, dacarta igu kiciyaye
Shan haloo idiin daran, dannigiin ka fiirsada
Mar waa inaad dayowdeen, diirad haddaydin qabateen.
Dadka aydin raacdeen. isna waydin diga - gubi
Dillaalkii la siiyana, dunna kama heleysaan
Ninkii idin darraabana, ajri iyo ducuu heli
Dibna deeqa Eebbahay, dibinta saari maysaan
Diin nimaan lahayni dameer caynsan weeyee
War maxaa dufulayahow, cadaawaha ugu daranteen ?
Wanka doosha weyn iyo, ma dagadaad u xilateen ?
Qandiga mayska duubtaan, dewarsigu ma fiicnee!
Awyaalow ma diiddeen, jahaadka maw dareertaan ?
Warma danana iyo seef, degta maad ku qaaddaan?
Darmaan baad la qooqdiyo, Doolaab maa u fuushaan

1. *Masafada oo dhan ka fiirso Diiwaanka Sayidka, Sheekh Jaamac, b. 97*



Wiyilka diirkaqaadkaa, bidixda mawgu dadabtaan
Doobbiga Xammaalkaa, dakarka maa ka goysaan
Daacufleyda madidaa, degdeg maw xabbaadhaan
Idinkaa dalkaba lehe, dawlad maw ahaataan
Illeyn doqoni calaf ma leh, dulbaax maxaa ka baylahay!

Afartaa dubbeeyaye, ma daabacay sidaydii
Ma daleeyey maansada, damiin baan aqoonine
Hadal diirsimaad gala, duri waa u eran jirey
Doodna waxaan u leeyahay, da' kastaba ha noqotee
Kuwii diinta qariyow, idinkays dilaayoo
Nin dalkiisii iibsaday, dulli buu ku waariye
Ninkii gaalka daba gala, darxumow dambaynoo
Naftu hadday ka duushana, dalku waysu diidiye
Inuu haadku diirdiiri, waa sida daruurtoo
Dulbaaxiisa feeraha, dab baa lagaga shidiyoo
Hadduu waayo darib cuno. waa laga dambeynoo
Ninkiise dawga dhaafaya, dawo looma helayee
Digtoonaada weligiin, dunidu waari maysee !
Doodna waxaan u leeyahay, dumarkiyo carruurtoo
Dadkii idin ka weynaa, hadday idin dulleeyeen
Dembi kama ay yaabine, cuntay idin ka doorteen
Duunyaa la dhaafsaday, dugsigaad geleyseen
Dameerkuna ma yeelen, halkay talo ku deysteen
Dab intay shideen bay, dalaq idinku siiyeen
Doox intay qodeen bay, ciid idinku daadsheen
Nin idiin damqanayaa, idinkama dambeeyoo
Haddaydaan digtoonaan, daad baydin qaadiye
Duleeddada kufaartaa, dacas idinku laynoo
Naf dalkaaga dooneysa, firaash looma daadshee

Dabkan aan shidaayaa, dawadiinna weeyee
Dariiqii rasuulkiyo, dawga ha ka bayrina!

( Markay dhammaato ayaa Cismaan Boos soo gelayaa oo oranaya ) :

*Cismaan Boos :*

Daraawiishta baxaysoy! Fariin Sayid Maxamad baan wadaa. Ninkii oday coobir ah dila isagaa hor Ilaah u qoolan. Naagtii uur leh iyo ninkii caruur dila isagaa hor Ilaahay u qoolan. Nin socdaal ah oo kub-ku-boorre ah ninkii u qalab qaada isagaa loo haystaa Ilaah hortii iyo banka Qiyaame !. Sidaas maanka ku haysta. (Raggii la diray way baxayaan, intii soo hadhayna tababar bay gelayaan).

## *A R A G G A 23d*

*TILMAANTA ARAGGA :*

Waaliga Ingiriiska oo warqadi hor taallo. Askari buu u yeerayaa oo ku leeyahay :

*WAALIGA :*

(isagoo warqaddii weli indhaha ku haya) : Iigu yeer Taliyaha Ciidammada. Degdeg ha iigu yimaado!

(Taliyihii baa soo gelaya, isagoo dhiillaysan oo oranaya):

*TALIYE :*

Subax wanaagsan, Seer.

*WAALIGA :*

Subax wanaagsan, fariiso.
(Waaligaa istaagaya oo oranaya):

*WAALIGA :*

Warqad baan saaka heloo
Wadeeco aan la filayn iyo
Wax xun baa ku qornaa



*( Aamus yar )*

Wadaadkii duubka lahaaye
Daraawiishta watay
Weerarro xoog badan buu
Soomaaliya ka wadaayoo
Waddankii ka sameeyey
Wakiilkii Berberaad iyo
Askartiisii wacnayd
Walaaqyoo badi laa
Reer warfaa Cali Jaamac
Waaxyo weynta Jibriil
Kooshinkii weheshey
Xandulle Geeddi Wardheere
Qabiilkaan wadannee
Wehelkeenna ahaa
Wacdaruu ku sameeyey

*( Aamus yar )*

Weer kalaaban xusuutaye
Mee raggii wacwacnaaye
Waranku aanu karayne
Aan warjeefka u haystey
Mase waa iswatanoo
Wiilashii xoogga lahaana
Isagaa la wareegay ?
Odayadii weydda ahaana
Annagay hadal waaban
Wadaan hoos ka daloosha
Waalo aan sacab layn
Welgada noo tumayaan ?
Waa war loo noqon doonee
Libtaan maanta wadaadku

Watee uu naga qaatay
Weerar soo celiya
Waxa reer Yamyam jooga
Kun wiil oo hindiyaana
Waa inaan u dirraaye
Soodaantii webiga
Waa dhow aynu ka keennay
Wada qaad kurtigoodoo
Hub wanaagsanna siiyoo
Berri waaga aroorta
Berbera wiida salaadda
Cadceedda soo wugufkeeda
Hinjijiir wigicdeeda
Markay foodda nin weyn iyo
Waran caaradi gaadho
Dekedda haysku wareenoo
Yay magaalo ku weecane
Halkuu joogey wadaadku
Weerar hawgu baxeenoo
Waa inay wiiggan dhexdiisa
Lug iyo waax iyo jeeni
Darwiishka ay ka wadaan
Xeebta iiga wacaan!
Sidee baa nin wadaadihi
Noo walaacin karaa ?

*TALIYAHA :*

(si edeb leh) O.K. SIR. Ha la yeelo!

*A R A G G A 24d*

Sayidkii oo dhulka eegaya iyo Daraawiish fadhida. Nin ordaya (Abshir) baa u soo gelaya oo oranaya: Salaamu calaykum. Intaan loo celin ayuu isagoo argagaxsan oranayaa :



*Abshir Dhoorre :*

Sayidii indhoweydba
Korjoogihii soconaayey
Seerahaannu ahaynoo
War weyn baan ka sidaa
Safarkii awrta ahaaye
Saanaddu ay ku rarraydoo
U soo dhiibay Khaliif
Saakuu noo iman laaye
Saraar bay ka qabteenoo
Daraawiish la sadqee
Gaadiidkii sahaydeenniyo
Xoolihiina la saanyey
Ingiriis sibro dheeriyo
Saqajaan uu ku adeegtaa
Xumaantaana sameeyey
*( Aamus yar )*
Siin kaleetana waa
Saraakiisha Cadmeedna
Sir weyn baan ka hayaa
Markab saabku u buuxiyo
Dhawr kunoo salabkeediyo
Saanaddooda xambaarsan
Daraawiishta sargooya
Sahayda loogu dhammeeyey
Ayay soo bixiyeenoo
Saadda wayna hayaan.

*SAYIDKA :*

(oo qusuusidii la tashanaya): Maxamuud tali.

*MAXAMUUD :*

Sayidii, jahaad, ma talo kalaa jirta.

*SAYIDKA :*

Xaaji Suudi tali.

*SUUDI :*

Talo kale garan maayo. Jahaad baan gartay.

*SAYIDKA :*

(isagoo istaagaya): Aaway ninkii buunka yeerin jirey. Buunka yeeri.

(Marka buunka laba jeer la yeeriyo ayaa Daraawiish oo wada caraysani soo dhoobanaysaa).

*SAYIDKA :*

Hubhayihii aaway. Ii keen qoryaha iyo rasaasta !

(Qoryihii buu saddex saddex u soo qaadayaa oo Sayidka ag dhigayaa. Markaas baa Sayidku qoryaha nin iyo qori iyo shakad rasaas ah ugu qaybinayaa, isagoo leh):

*HAATUF :* *(1)*

Ma sabaan ka sabaan baan, nabad saafi ahaayoo
Sukuudoo edeb yeeshoo, sawd xun aanan lahayn
Ma sabaan ka sabaan baan, salowgaan kicinaayiyo
Saryankaan eryanaayiyo, sakhraankii iska daayey
Ma sabaan ka sabaan baa, so'yaqaanka dugaaggiyo
Haadkii aannu sabayney, soominnoo qadinnay
Ma sabaan ka sabaan baa, safarkaygu xirnaayoo
Suuqyadii Bullaxaar iyo, Saaxil aanan tegeynoo
Ma sabaan ka sabaan baa, sabadii Cagaciid iyo
Suubaankii Ballishiil, Soobir aanan ku ƒnaalin
Ma sabaan ka sabaan baa, sida siiggiyo cawsha
Saraar meerid ahaayoo, saafuroo aan maqnaayoo
Ma sabaan ka sabaan baa, sawjad aan nin lahayniyo
Sebi aabbihii waayey, sasab beena ku daajey

1. *Masafada oo dhan ka fiirso Diiwaanka Sayidka, Sheekh Jaamac, b. 145*



Ma sabaan ka sabaan baa, silcayeyda haweenkiyo
Salowgii ka baxaayey, sarsarkii gelin waayey
Ma sabaan ka sabaan baan, ergo soogan ahaayoo
Suudigii aan maraayey, samadeeyey jirkaygoo
Ma sabaan ka sabaan baan, raggaygii la sadqeeyey
Soofkaygii la xaraashay, sed yaa iiga cesha subax
noolba lahaa!

Ma sabaan ka sabaan baan, "Suweynow" ina daa iyo

Sarkaalaw da hayeyoo, saamacow laga waayey
Ma sabaan ka sabaan baa, su'aashii Rabbigey iyo
Suubbanow Nebigii iyo, saalixiinta xusaayayoo
Saacaygii i hayey!

Saxayoo ma xumaynoo, sarmaseegto u diidayoo
Sowd kalaa daba yaallee, balaan kaana sifeeyo
Ma xalai la i suurshoo, samadaa la i geeyoo
Seleloo isla boodayoo, saarkaygii i qabtayoo
Ma sawaadka habeen baan inaan suulasha labtiyoo

Sin inaan u fariistiyo, seexadkii kari waayey
Ma salaadda Ilah baan sahwiyoo garan waayey
Ma soortii aan cunaayaa, sibir ii dhadhantayoo
Ma sawaalka boqoolaa, sardankaan guntanaa iyo
Sammaddii aan maraayaa, sugulkaa iga yeelayoo
Ma suugaanta nabdeed iyo samaan baan la heleynoo

Inaan saamax ahaadaan, sina loo arkihaynoo
Ma samuuladka roob iyo, suuligii Maka yiiliyo
Sibbaakh khayli la moodyow, Dhooddi baan salabeeyey.

Saxayoo ma xumaynoo, sarmaseegto u diiday
Sowd kalaa daba yaalee, balaan kaana sifeeyo
Ma siddeetan uluufoo, saadadii jabartiyoo
Sinjigay laga uumaa, siraayuu guntatayoo
Ma siddeetan uluufoo, sadarkii cilmigii iyo
Suuraddii albaqraad, subcisaa umashayoo
Ma siddeetan uluufoo, saajacoo aan baqaynoo
Suufiyoota dagaalkaa, saanaddii xiratay.
Ma siddeetan uluufoo, sumucii wadatoo
Sabuul khayli ku joogtaan, sida suurka afuufi
Ma Soomaali riddowdaan, midaan saabka ka toogtiyo

Midaan suunka ka gooyiyo, midaan saabir ka yeelo
Saddexdaa aan huraynoo!

Ma safkaannu collowniyo, Suweeynaa inankiisiyo
Saaxir xayra - dayeenaan, sadqo looga turaynoo.
Kuwii diinta siraayey, sallallaahu caleehi
Sunnihiisa Khilaafaa, sandalaa laga jeexi
Ma kuwii sunta leefiyo saaruuq baan fakanaynoo
Ma ruuxaan sababaa baan, sayi'aad ka kordheynoo
Ma sawaab iyo khayr baa, samaydayda ku dheehan
Waa siyaada Ilaahe, ma sareeda adduun iyo
Simaadhii jannadii baa, nala siinahayaa.

## *A R A G G A 25d*
## *DAGAALKII DULMADOOBE*

*TILMAANTA ARAGGA :*

Dagaal kulul baa dhacaya. Dhawr sarkaal iyo askar badan baa la laynayaa. Ingiriiska oo jabaya iyo Ismaaciil Mire oo gacantii Koofil goosanaya. (Labada qolaba dharkoodii hore ayay qabaan



## *A R A G G A 26d*

Daraawiish oo dabbaaldegeysa oo welgoonaysa. Sayidka ayaa soo gelaya, kolkaasuu u yeerayaa Ismaaciil Mire oo ku oranayaa:

*SAYIDKA :*

(oo farxadi ka muuqato): Ismaacilow dagaalkii Dulmadoobe ee aad gasheen war buuxa naga sii. Ambabixiinnii, gebagabo-dhiggiinnii, siday gaalada wax uga halligmeen, soo laabadkiinnii, geelii aad cadowga ka hesheen iyo saamigii aad ka qaadatay, intaas oo idil gabay noogu sheeg.

ISMAACIIL : Dayıb Sayidi.

*HAATUF :*

Annagoo Taleex naal jahaad taladi soo qaadnay
Toddobaatan boqol oo Darwiish toogatay neef doora

Sayidkeennu tii uu na yiri torog ku heensaynay
Shakadaa intuu noo tebbedey noogu tacab qaybi
Ilaahay ha tabantaabiyee ducada noo tuumi
Wareegada rag baa waxay tewali yaan wax kaa tegine

Annana towlka qaalmaha nin iyo tulud u soo saarray

Sibraar caana geel loo tabcaday talax ku sii maallay
Tiirkii rasuulkiyo sharciga toog ku wada fuullay
Galabtaa taxaabiyo kadlaba toobiyaha raacnay
Habeenkii fardaha waw turraye taag ku sii mirannay

Tun biciida lagu qoofalyow xamashka loo taabey

Talaaduhu markii ay dhaceen telalay oo reemay
Tixda gabay markii aan akhriyey toose niman
jiifey
Tiraabkeygu meeshuu ka baxay la isku soo tuumi
Salaaddii markii aan tukaday yaarka kaga taagnay
Togga 'Ulasameed dooyadii horay u tuuryaynay
Intay timacad noo soo arkeen marada noo taage
Annaguna jahaad kama tagnee tiimbad ugu roorray
Sengeyaal tabaadiyo gool weerarka u tooxnay
Tiiraanya ololkii dhulkii Taani naga qaadday
Tollaalla, ayda qaylada Berbera tahan la weydaari
Taambuuglayaashiyo kuway tebeysey soo gaare
Teysaha gugii oo hanqaray tininigtii yeedhay
Talaxumada awrkuu u xiray baqe taraarsiinnay
Girligaanku meeshuu turqaday lagu tunsii geela
Turjubaannadii iyo halkaa koofil lagu toogey
Gaaladu waxay tacab lahayd taabnay galabtaase
Maadhiin turaabkaa ka badan tuurta kaga qaadnay
Tukihii intaan niman u waray tobanle soo qaatay
Gebagaba u tooxnoo kufriga maarre kaga teednay
Tafwareeman maynine intaan tubay ku aynshaadey
Galabtaa carraabada ku timi turugga Buuhoodle
Habeenkaa ninkii tabar lahaa tarantarree gaarka
Habeen kale taxaasheey Nugaal godan u tuur-
yeynay
Habeen kalena tuuraha Cadduur toolin kaga
maallay
Habeen kalena Tagaabeeye iyo tu'innay Hayllaawe
Habeen kale Dariiqada tubnoo toosan lagu qaybsay
Toban gool tabaadiga dhigiyo toban unuun-gooyo
Iyo toban tiftii hore rimoo taani lagu qooqshay
Iyo toban abeer tawllanoo tixinka qaalmooda



Iyo toban irmaanoo aniga la igu taageeray
Iyo taan eryoon jirey markay tubantahee joogto
Been laguma tookhiyo afaan taabud noqonayne
Intaa Xarunta waa tubay xaq waa lagu tanaadaaye
Warka Tuurre waa laga hayaa tan iyo Iimeye
Waa Xamar tarrara oo misana taab ku sii daraye
Taltallaabsigiisiyo kabtiga tabo kalow dheere
Anigana tis bay galay intaan col ugu taagnaaye
Tuludna uma godlaan reeruhuu tawl ka saan-
yadaye
Tafantoofka gaalkuu u diley waa tixgeliyaaye
Suldaan Ruunna loo tebi inuu tuuladii gubaye
Tima soohanlow Eebbahay kuma tabaaleeyo !

(Kolkuu dhammaado ayaa Ismaaciil Sayidka soo hor dhigayaa gacantii Koofil oo oranayaa) :

*ISMAACIIL :*

Sayidii adiguna middaan ka gabay.

*SAYIDKA :*

Waa yahay (3jeer).

*HAATUF :*

Adaa Koofilow jiitayaan, dunida joogayne
Adigaa jidkii lagugu wadi, jimic la'aaneede
Jahannama la geeyow haddaad, aakhiruu jahato
Nimankii jannow kacay war bay, jirin inshaalleeye
Jameecooyinkii iyo haddaad, jawhartii aragto
Sida Eebbahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda.
Daraawiish jikraar nagama deyn, tan iyo jeerkii
dheh
Ingiriis jabyoo waxa ku dhacy jac iyo baaruud
dheh

Waxay noo janjuunteenba waa, jibashadiinnii dheh

Jigta weerar bay goor barqo ah, nagu jiteeyeen dheh

Anigana jikray ila heleen, shalay jihaadkii dheh
Jeeniga hortiisey rasaas, igaga joojeen dheh
Jiiraayadey ila dhaceen, jilic afkoodii dheh
Siday kuugu jeexeen magliga, jararacdii sheego
Billaawuhu siduu kuu jarjaray, jiirarka u muuji
Nafjeclaysigii baan u iri, jaallow iga daa dheh
Jaljalleecadii baa wadnaha, jeeb ka soo ruqay dheh
Jeedaaladii baay indhuhu, kor u jillaadmeen dheh
Jimic kagama helin tuugmadaan, jiriyey ruuxii dheh

Markaan juuq iraahdaba afkay, iga jifeeyeen dheh
Dhaaxaan jalaacaye dheg baan jalaq la ii siin dheh
Goortaan jarreerana gefoo, nolol ka jaanqaaday
Sida jananadii hore tashigu, igu jaguugnaa dheh
Taladii jinnigu ii hormaray, jaasadeed helay dheh
Jiidaha xanuunka leh markii, la igu jeeraarshey
Jibaadka iga soo baxay dadkii, jiifka qaban waa dheh

Markay rubaddu jaw tiri or bay, iga ag jiibsheen dheh
Jirkaygii bahal baa cunoo, jiitay hilibkii dheh
Jurmidiyo baruurtii dhurwaa, jugux ka siiyaa dheh
Jiljilladiyo seedaha tukay, igaga jaadeen dheh
Haddaan lays jikaareyn tolkay, laga jil roonaa dheh
Weligood waxaa lagu jaraa, jilibdhig duullaan dheh
Daraawiishi waa jibindhowga iyo jowga soo bixi dheh



*A R A G G A 27d*

*BARLAMAANKA INGIRIISKA*
(sidii markii horaa loo fadhiyaa)

*GUDDOONSHE :*

Fadhigani, sidaad og tihiin, ma aha keenni caadiga ahaa. Waa fadhi uu codsaday Wasiirka Isticmaarka ee dawladda Xisbiga Muxaafidiintu. Arrinta taas ku dhalisayna isaga ayaa naga dhergin doona. Hadalku wuu furun yahay, waxaana qaadanaya Wasiirka Isticmaarka (Dharkii ay araggii 14d qabeen iyo isla habkii fadhiga).

*W. ISTICMAARKA :*

Dagaalka weyne adduunka
Dabkiisu uu wada gaarey
Waxa nooga darraaday
Daraawiishta warkeedee
Aan ka doodno sidii
Daawo loogu helaayo.

*Mr. JOHNSON :*

Oo maxawgu dambeeyoo
Daraawiish laga sheegay ?

*W. ISTICMAARKA :*

Wararkii u dambeeyoo
Lagu keenay digniinta
Aan idiin dildillaacshee
Dorraad waaberigii
Illaama duhurkii
Dabku wuu qarxanaayey
Cadan kii degganaa iyo
Dalxiis kii ku maraayiyo

Dadkeennii wada laaye
Doorarka ay qasheene
Ay dooxeen wadnahooda
Hilibkooda dubteen
Dambaska ay ka dhigeen
Dul ahaan tiradoodu
Waxay daafo martaa
Lixdan kunoo isku duuban
Oon maydkoodii la dareemin
Halkii uu ku dambeeyey
Koofil baa u darraayoo
Marka ay deldeleen
Degta ay ka jareen
Dubka oogada saaran iyo
Diirkii way ka baxsheenoo
Dibnahay ka jareenoo
Daabbad baa lagu qaaday
Si daraawiishta dhexdeeda
Dabbaaldeg loogu sameeyo.

*Mr. JOHNSON :*

Ma dawlad baa nimankaa
Dadka laynahayaa ?
Askartu may garbo duubto
Jeedal may kala daasho
Maxayse doonahayaan ?
Bal noo sheeg dulucdooda.

*Mr. CHURCHIL :*

Daraawiishta warkeeduba
Weli waanu ku diirine
Anaa dooc u hayee
Haddaanay dawlad ahayn



Ma geysteen dembigaas
Iska daa ragga doontiyo
Askar aad u dirtaaye
Dabaabaadka la geeyaa
Durba waa ay gubtaan
Waa ragaan daalku karayn
Marna diiftu ka muuqan
Waa rag caano durduurtoo
Daribta geela ku naaxay
Waa rag diinta Islaanka
Ku dhaartoon damqanayn
Midka aad ka dishaana
Lama duugo habeenkee
Aroortii wayska diyaaroo
Qoraa deegta u saaran
Daarta ay ku jiraan
Haddii aad dumisood
Madaafiic ku duqayso
Dhawr maalmood dabadood
Dabakhyey ka dhigaan.
Waxay doonahayaanna
Aan kuu sii dildillaacshee
Ingiriis dabargooyoo
Ka kaxeeya dalkiinnaa
Dubaaqooda ku beeran
Habeenkii way dikriyaan
Duhurka way tukadaan
Dagaalkaa ay wadaan iyo
Diinta waysku hayaan
Inay dawlad noqdaanoo
Ingiriisku dushooda
Aanu xaabo ku doonan bay
Ku daraan wacdigooda

Xeebtii aan degganayne
Dekedda aan ka samayney
Dooxatay ku noqdeenoo
Ismaaciil dadqal baa
Duhurkii ka ugaarta
Diir cad kay ku arkaanna
Isaga way deldelaan
Dayuurad aan u kaxaynoo
Soo duqaysaba mooyee
Dabaabaad badda raacoo
Aan dul geynaba mooyee
Rag siyaasadda daadshoo
Dhex dabaashaba mooyee
Degganaha jooga halkaasoo
Derejada aannu ka qaadnoo
Aan ka diirnaba mooye
Wax kaloo u dawaa
Dariiqeed garan maayo.
*( Aamus yar )*
Barlamaanku ha doodo
Dacwadduu keenay wasiirku
Waxba yaanay ku diidine
Darwiishkaas si an maanta
Magaca dawladda weyn
Ugu layno dadkiisa
U kaxeeya dayaarad
Bam iyo qiiq kala daasha.

*Mr. JOHNSON :*

Dembigaa kharashkiisa
Dawladdu xoog uma hayso
Dagaal kaa ka ballaran baa
Duullankii lagu saaray



Askartii dukun daakun
Rasaastii dab dhalaalay
Doollarkii eberkiisa
Dhaqaalihii dalka oo dhan
Daqarkii naga gaarey
Dawankii dhegahayguu
Ka sii doobinayaaye
Daraawiishta haddaan
Dabaabaadku karaynoo
Dadka hoose wax yeelin
Sida uu CHURCHIL doodda
Aqoonta noogu daliilshey
Ayada aynu ku daynee
Dayaarada dhawr kaxaysoo
Xaruntooda duqeeyoo
Ilaa ay ka didaan
Ha ka deynin bamkooda
Halkay maalin degaanba
Duhurkii ugu geeya
Waa dadkaa umigaahoo
Markuu guuxa dareemo
ay dayaarad arkaan
Dabka ay ku ridaanna
Aanu soo dejinaynin
Iyagaaba ka daaliyoo
Mid dantiisa ka raacdiyo
Mid dhintoo aan la duugin
Dabadeed noqon doonee
Siyaasaddaas bal ku day!

(Xubnihii Barlamaanku talada ninkaas dambe ayay u sacab-binayaan).

*GUDDOONSHE :*

Fadhigu waa xiran yahay, Waana inoo sidaas.

## *A R A G G A 28d*

*HAATUF :*

Dhowr iyo toban goobood oo kulkulul kolkii ay Daraawiishi gaalo la soo gahsay, badankoodna ku guuleysteen ayey isbideen oo, haddana, taawiyeen inaan cid wax ka tari kartaa jirin. Markaas bay isdhigteen oo tabaabulshahoodii sidii hore ka soo yaraaday.Tiradii bay inta ka bateen ayaa Sayidkii xukumi waayey oo qaar badani xoolo aan loo dirin soo dhaceen, dad aan lagu ogeynna weerar geliyeen, iyagoo magaca Daraawiisheed ku soconaya, cimaamaddoodana huwan. Khilaaf iyo aamindarro ayaa dhexdooda ka aloosmay laga bilaabo 1916kii ilaa dabayaaqadii 1919kii.

Dad badan oo xoolo raadis ah oo aan jahaadka u heellanayn ayaa Xarunta ka soo buuxsamay. Rag door ah oo loo han weynaa baa baxsaday ka dib markii ay xoolihii Daraawiisheed kaxaysteen, wixii dad ahaa ee ay heli karayeenna duufsadeen. si ay Dariiqadu u baabba'do oo Sayidka agtiisa ammaan loogu waayo ayay rag badani dembiyo fool xun u galeen oo dad aan wax ay galabsadeen la arag dhegta dhiigga u dareen. Waxay ugu dan lahaayeen marka waxaas oo kale dhacaan in dadweynaha Xarunta joogaa walaaco oo la yiraahdo, "Caku, Sayidka". Siyaasad waxay ahayd ay ka dambeeyeen gumeystayaalka iyo Soomaalidii garabka u ahayd, in ay u le'ekaatabana ku guuleyste oo Maxamuud Xoosh Dheere oo ka mid ahaa madaxdii Daraawiisheed, lagana waraystay jabkii Daraawiishta waxa laga hayaa, "Haddii xataa ayan dayaaradaha Ingiriis noo iman annagaaba kala tegi lahayn". Ummad kasta ama urur walba, cadowga u weyn ee uu leeyahay ka sokow waxaa jebin



kara waxaa ugu khatarsan khilaafka iyo shakiga. Waana waxyaalahaas arrimihii jabkii Daraawiisheed ugu wacnaa.

*TILMAANTA ARAGGA :*

Daraawiish dhawr ah oo shaki iyo walaac ka muuqdo oo shaxysa. Mid baa inta kacaa-fariista oo ragga shaxaya midkood inta kale ka soo durkiyo oranaya :

*JAAMAC :*

Beryahaan Caliyow
Caloolyow iyo taah baa
Calooshayda ku beermay
Dhawr habeen ma cashaynin
Cabbaar meel ma aan seexanoo
Tallan iyo calwasaad baa
Cindigayga ku beermoo
Inaan caawa dhaqaaqoo
Cishaha ayda aan jeexoo
Cagta aan jidka saaroo
Cidihii iska aado
Cararaan ku dhammaystaye
Ilaahay cilmigiisiyo
Caalinkaan kugu dhaarshaye
Adoon ceeb iga sheegin
Talo aan i ciriiryin
Anna aan ku carraabo
Maygu caawin kartaa ?

*C A L I :*

Rag haddii u cuslaado
Beryo joogo ciriiri
Meel colaadi ku raagtay
Weerar laysku cabbaayo.

Rag cawgiirta noqday
Senge cooddi ballaaran iyo
Caynab aan hakanayn iyo
Casar weerarka hawdka
Cirirkii mid yaqaanoo
Dhawr guyoo isku cayna
Cidlo aan qof u joogin
Markuu hoogga cabbaysan
Ka caddaado dhexdiisa
Cub markii la yiraahdo
Waa inuu ka ceshaayoo
Cir yiraa dhinaciisee
Caloolyowga ad sheegtay
Amba ciilkiyo taaha
Waa qabaa caradaasoo
Indhahayga casaanka
Cawlka aad ku arkayso
Xirribtayda cagaaran
Cillaan geedka la moodo
Dhawr cishaanan kulmoonoo
Fakar baa cunahayga
Cabbaadyo ay la noqdeenoo
Sida koor la cafuufay bay
Dhegihii i cubmeene
Casarkii aan baxnee
Halkee aan u carrownee
Cid inoogu sokaysa ?

**(Sayidkii baa kolkaas soo gelaya. Markuu fariisto ayaa Ismaciil Mire oo buraashad wataa soo gelayaa. Markuu salaamo** ayaa Sayidku **oranayaa):**

*SAYIDKA :*

Ismaaciilow, bal sodcaalkaagii Daraawiish uga warran.





Beryihii la isqaybshee
Bogox tooska galbeediyo
Bari aan kala aadnay
Waxaan ahay reer Berberaad
Daraawiish ku baxday
Barbaarkii u horreeyey
Bil markaannu dhex joogney
Baqool maalin sawaal iyo
Guure aan ku baxaynaye
Budulka aan kor u haynay
Ayaan goor barqadiiya
Berberoo iska jiifta
Ingiriis isballaarshey
Belo aanu filayn
Fardaha suuqa ku beegnoo
Magaalada bartankeedaan
Bamka qiiqa ku tuurroo
Rasaas aan ku bilawnoo
Rag birta iska waraabshay
Marka ay ka baxeenoo
Baqdeenoo carareenna
Inta aan badda aadnay baa
Dabaal waa la bartaaye
Cabbaar beerka u jiifnoo
Mawjaddaa burqanaysa
Saa markay u butaacdaba
Bogga aan ku ordeynay
Haddaad been iga moodi
Waa kuwaa biyaheedii
Buraashadday ku jiraan.
*( Aamus yar )*
Bixiyoo iska dhaafaye

Budulkaan dib u qaadnoo
Soo baqoollay harkiiyoo
Habeenkii dhex barinnayoo
Reer bariisanayaan
Bud ku soo niri waagoo
Nin xaaskiisa ka baadey
Bahdi way ka luntaaye
Been ma sheegto carruurtuye
Inan aad barni mooddoo
Shan jiraan maandhe bariidshoo
Bilaney magacaa baan
Ku bilaabay warkiiyoo
Barni weeye adeer bay
Jawaab iila bareertoo
Barney aabbena mee ?
Ayuun baan ula bayray
Daraawiishta balaayuu
Boqorkooda yahaay
Jawaabtii bixisay
Bal ii sheeg magaciisa
Ismaaciil Mire Baashi
Beerdhiga gaalada laayey
Geesi aan biqin weeye
Ayay iiguna baantay
Bushimaheeda warkiiyoon
Qaar ka soo bixin baan
Faraskii ka dul boodayoo
Intaan beerka ku qaatay
Yartii baan ku dul booyey
Anigoo beer laxawsi
Indhaha baalasha hoose
Biyihii ka da'aayey
Ay haan buuxin karaan



Gaaridii baxsanayd oo
Beerka aan ka jeclaayoo
Beryo aannu isweyniyo
Faadumaa igu buuqday
Anoo taagan bartii baan
Gabay dheer ka bilabay.

*SAYIDKA :*

Ismaaciilow bal kaana noo mari.

*H A A T U F :*

Faadumoy falaadkayganaan fiiro kaa bariye
In faseexad loo wada hadlay gobi ku faydaaye
Fahmadaba adaan qaadan baad feero hadashaaye
Fillan naag taqaan waa ibleys furq alluu eeeyne
Fidmadeeda xaajada adaa faraya shaalleeye
Fahmadaba adoon qaadan baad feero hadashaaye
Fillan naag taqaan waa ibleys furq alluu keenye
Feddedaan wareegaa sidii farow ugaareede
Ma furfuro habeenkii guntiga foore soo dhacaye
Xeeryaha fandhaallaysan iyo Faarac lebenkeeda
Fujaannada la soo sidiyo foonka malabaysan
Fartaydaa anoon saarin baan fuuli Looshane e
Ha furfurin dermada layga waa inaan fariistaaye
Foolkii astaadkaan ku helay faydo iyo khayre
Faataxo markuu ii maraan farax dhaqaaqaaye
Ma fakhriyo shareecada ninkii faraqa haystaaye

(Kolkii gabaygaas la mariyo ayaa dhawr jeer guux dayuuradeed la maqlayaa, dabadeedna bamkii hore iyo kii labaad baa Daraawiishta ku dhacaya. Dhawr Darwiish baa dhimanaya, Sayidkana marada dacalkeeda ayaa ka ololeysa. Markaas baa dhawr nin inta gacamaha qabtaan la cararayaan).

## A R A G G A 29d

*H A A T U F :*

Dabayaaqadii 1919ki ayaa Ingiriisku ku kacay tallaabo xoolannimo oo aan laga filayn inay ku kacdo dawlad xoog weyn oo la dagaallamaysa kacaan aan naftooda ma ahee cid kale ku tiirsanayn. Wax kale oo ay Sayidka iyo Daraawiish ku sameeyaan kolkii ay garan waayeen ayay madaxdii Ingiriis goosteen inay kala dagaallamaan hawada, badda iyo dhulka intaba. Dayuuradihii ugu horreeyey ee Afrika yimaada, Kacaan gobannimadoon ahna lagula dagaallamaa waxay ahaayeen kuwii Daraawiish loo soo diray oo sida isdabajoogga ah xarumahooda u duqeynayey. In kastoo dagaalka hawadu uu ku cusbaa, hub u dhigmana ayan haysen, haddana wayska celiyeen, middoodna dhulkayba soo dhigeen-sida la yiri-iyada oo ololeysa.

Hawada, badda iyo dhulkaba kolkii lagala dagaallamay ayay Daraawiishi kala qaxday oo ninba dhankii uu dan moodey wejiga saaray. Sayid Maxamad iyo intii raaci karaysey waxay beegsadeen Khaliif Sh. Cabdille Xasan oo ay Sayidka walaalo ahaayeen, madaxna ka ahaa Xarunta Daraawiisheed Laanteedii labaad ee ka oodnayd Qorra iyo Shinniile. Halkaas markii ay tageen Ingiriisku warqado iyo ergooyin nabad-raadis ah ayuu u soo diray, isagoo mar walba ku ballan qaadayey inuu uu dhul dego iyo xoolo aan xisaab lahayn ku bantookhi doono haddii uu isdhiibo. Sayidku taas uma dheg taagin, wuxuuna isu diyaariyey inuu rogaal cusub celiyo. Dhowr toddobaad ka dib ayaa xaruntii cudur saabato ahi soo food saaray oo furuq iyo fanto ku dhex fideen, halkaasna Khaliif iyo rag badan oo kalaa ku geeriyooday. Ingiriisku, in kastoo Sayidkii ka fogaaday, haddana cabsidii uu ka qabey kor ayay u kacday, sidaas awge-



edna wuxuu hub iyo rasaas ka simay Soomaalidii taliskiisa ku hoos jirtey, uguna baaqay inay Daraawiish soo dabargooyaan. Taladaasi Ingiriiska way u meel martay, hase ahaatee guul kama gaarin dantiisii ugu weyneyd ee ahayd in Sayidka la soo dilo oo maydkiisa Berbera looga dul dhaanteeyo. Colkaas Ingiriisku soo saaray waa colka la magac baxay, "Hagoogane" ee Daraawiish xoolaheeda lagu mooraduugay, rag doorana looga laayey. Sayid Maxamad iyo 400 oo nin oo Daraawiish ah ayaa markay taasi dhacday u ambabaxay Go'ane Iimey oo ku taal webi Shabeelle xaggiisa Sare, markuu tegeyna wuxuu ka sameeyey Xarun cusub.
(Abshir Dhoorre ayaa garab fadhiya Sayidka oo jiifa oo jirran. Markaasuu oranayaa: "Iigu yeera raggii dhirta yiqiin". Kolkay yimaadaan ayuu oranayaa):

*ABSHIR DHOORRE :*

Ilaahay uma daayoo
Dunida ruux kuma waaro
Taa waxaa u daliila
Haddii deeqsi wax dhiibiyo
Nin diintiisa ku dhaata
Loo deynaayo ifkaan
Rasuulkii alla doortey baan
Duhurkii ka tageene
In kastoo an dedaalley
Kufrigii bar dulleyney
Dayuuraadka markay
Xaruntii ku dunsheen
Dan baa meesha na keentay
Qorrana doorarkii joogey
Waatay qaar ka dileenoo
Dorraad saannu ogeyn

Waxaan duunyo lahayn
Danabyadii harsanaaye
Khaliifoo u dambeeyeyna
Fanto aynu la duugnay,
Haddiyo maanta dantii
Sayidkii dadka nool
Dunida aan u jeclayn
Dibindaabyada gaalo
Kuu u soo diray Eebbe
Inay duumadi haysiyo
Inay doogtiyo hawshii
Dacartii ku kacdoontay
Iyo Eebbahay daayow
Inuu mawdki dul joogo
Annagoon doocna u hayn
Wakaa noo dedan meeshee
Raggiinnaa wax daweeyow
Dabiibee geedaha shiilow
Orodoo duurka ku yaacoo
Dixidaad aragtaan iyo
Jaleelada doogga ka daadshoo
Dareemaha xididkiisa
Dhacaan deeqle ku miiroo
Doombir iyo jiic isku laaqoo
Sayidkaa dawadiisa
Ninkii soo duba maanta
Deeqaan ruux u xisaabin iyo
Derajaa lagu siinoo
Loo ducaynahayaaye
Degdegoo orda yaacoo
U soo laabta dadaal.

(Tahktarradii baa baxaya. Inta ay maqan yihiin ayaa Abshi[r] iyo Sayidku hoos u sheekaysanayaan. Kolka ay soo noqdaan



[Ki]n yar dabadeed, ayaa kan hore inta soo dhowaado oranayaa):

*[T]AKHTAR 1:*

Abshirow dawdaan
Doonay waa an sidaaye
Sayidka aan ku dabiibno.

*[S]AYIDKA (oo jiifa):*

Maxay tahay dawadaa
Ninku doonaye keenay ?

*[T]AKHTAR 1:*

Doombir iyo xabag-dhiig iyo
Dacar baan isku shiilayoo
Intaas oo laysku daraa
Iska daa duumo kaneecee
Madaxii dildillaaciyo
Daqarka waa ay kabtaa
Dacartana waa wax u roonoo
Waa dishaa qarasta
Waa sidaa dawadayduye
Sayidii aan ku dabiibo.

*[S]AYIDKA:*

Ma haysaa dawo fiican
Taydu maaha dareene
Dabargoysa Kufaarta ?

*[T]AKHTAR 1:*

Taa halkee baan u dooni ?

[T]akhtarkii labaad oo aagaan sita ayaa soo gelaya, markaas buu [or]anayaa):

*[T]AKHTAR 2:*

Abshirow wayga diyaar
Dawadii Sayidkeennu

Waxaan doonayba keenaye
U sheegoo ma duraa ?
Dusha mawga rognaa ?
Ha daacee labo jeer
Aagaan mawga darraa ?

*SAYIDKA :*

(oo si tartiib ah madax kor ugu qaadaya).
Ilaah baa wax daweeyee
Maxaad keentay dushaydoo
Aagaanka ii dari layd ?

*TAKHTAR 2 :*

Dixi baan sonkoreeyey
Deeqlaan caano ku miiray
Dharjaan diirka ka qaaday
Dabayood mirihiisaan
Daasad booc ah ku qooshay
Daran iyo xabag beeyaan
Jillab dhuuxi ku daadshey
Garaska waa la dubaaye
Higlana waan ku duqeeyey
Ontorre uu dabagaalle
Waa fog ciidda ku duugtiyo
Dharkayn baan isla doontayoo
Ayana waysku dillaacshey
Wan weyn oo dixi daaq ah
Dulbaaxdii baridiisaan
Heenki doobi ka buuxshayoo
Ku daroon raacshey kuwaase
Ilaah baa ku daweyne
Sayidka aan ka durduurno.



*SAYIDKA :*

War aniga dawadaydu
Walaal maaha dantaaye
Isticmaar dunjigiis
Dalka tii ka eryeysoo
Ma haysaa dabargoysa ?

*TAKHTAR 2 :*

Sayidii taa ma aan doonin !

*TAKHTAR 3 :*

(oo soo dhowaanaya)
Waxaad meel fog ka doontaan
Degdeg loola imaane
In kastoon yare daahay
Waa wadaa dawadiiye
Abshirow ma dakaame
Sayidkeenna ma duule
Waa diyaare u dhiib !

*SAYIDKA :*

Daawaduu keenay bal haybi.

*TAKHTAR 3 :*

(intuu xagga Sayidka u durko):
Sayidii dawadaani
Waa mid diinta ku saabsanoo
Kitaab aan ka daliishey
Oof - wareenkiyo daafka
Durey iyo qaaxiyo feero
Dacar iyo duumiyo xiin
Jadeecada dildillaacda
Doogta raagtiyo diifta
Dabayshiyo tuf la duugo

Waraabow dunjigiisa
Dibbiriyo neef isdadduucda
Laab-dillaac soo duxiddiisa
Honog dhiiggu da'aayiyo
Yaradkoo isku duuban
Daalka seedaha laabma
Dhan dillaac madax weyd ah
Daqayaha dhabarkoo dhan
Xididdada ka dikaama
Cudurrada dadku qaado
Aan duq iyo mawdka ahayn
Waa tahliil la daryeeloo
Waa tuf aayado doora
Waa daliilka Quraankee
U toos aan kugu daadshee !

*SAYIDKA :*

Allaha kuu dembi dhaafee
Ma waddaa dawadii
Soomaaloo isku diir ah
Diddayoo anfariisan
Oon danteeda ogeyn
Isu soo duwi laydoo
Gaaladoy la dagaashiyo
Jahaadka u dalban laydoo
In dalkoodu xoroobo
U daliilin lahayd ?

*TAKHTAR 3 :*

Taasi wayga da weyntoo
Savidii dawadaas
Daliilkeeda ma gaarine
Waysku soo deyi laa.



Saddexda takhtar ayaa Abshir «Iska taga» oranayaa. Markaas buu Sayidku sariirta toos ugu fariisanayaa oo soo jeesanayaa. Gabaygii «Dardaaran» ayaa bilaabanaya.

*HAATUF* ·

Min daroofle aqal daahya weyn, dadab la heedaamay
Darmo iyo furaash lagu gam'iyo, daalam iyo googo
Aniga oo waxaan doonayaba, derajaday haysta
Iyo duni wixii nagaga lumay, dararkii Ceeldheere
Dab wax gubi dayuurado Kufrigu, nagu dul gawdidshey
Dumbuq sumuca degalkaan ka kacay, dahab wixii yiilley
Dakhal jabay wixii daar burburay, ama bakaar duugmay
Didibtii bannaanayd wixii, dad iyo maal jiifey
Diric iyo waxay Shiikh dileen, ama duq waayeela.
Maxajabad daboollayd wixii, gaal u dukhuulaayey
Lo' durdura wixii deebla geel, nala ka sii daayey
Dullihii shareerraa wixii, daal na caga gooyey
Dirrowgii qabsaday reerkayaga, dalankicii gaarey
Dulkuneefle kaan soo ag maro, duullan ka kor geyska
Dan la'aan waxay nagu faleen, darab nijaaseedku
Doonyaha shammaalka ah haddii, dakhalka loo laalo
Maruun baa dabaylaha dhacaa, kor u dandaanshaane
Oo doofaarradii ku jirey, daraxu caynshaaye
Dabro cudura duuma iyo furuq, waxa dadkii xaaqay
Annagu diidi maynoo mar baan daayin noo wacaye
Ninkiise tiisa loo deynayaa, haygu diirsado e
Kolna haddaan cid laga deynahayn, mawdka dabaqdiisa

Ninkii haatan nagu diganayow, dan iyo xeeshaaye
Dangaraaradii nagu dhacdiyo, webi dabaashiisa
Inkastoo daleel nala dhigaan, doocna nagu cayman
Duuflaalladii naga harow, dan iyo xeeshiinna.
Doodna waxaan u leeyahay dadkeer, hadalka deyn
    waayey
Nimanyahow damiinnimada waa, lagu dulloobaaye
Dadku wuxuu jeclaystaa waxaan, duxi ka raacayne
Dagaalkii nasaarada anaa, daalib ku ahaaye
Dalka ma lihid anigaa ku iri, doora weynaha e
Daliilkii rasuulkii anaa, doonayoo helaye.
Anaa diiday maantuu lahaa, deeqan iga hooye
Diinkayga anigaan ku gadan, dabaqi naareede
Anaan labada daarood tan hore, derejo moodayne
Markay duushay gaaladu anaan, daabbadduu rarine
Goortay dareeraan anaan, diiradduu qabane
Anigaan dariiqiyo waddada, dowga sii marine
Anaan doora weynow Kufriga, daacadnuu geline
Ferenjiga dirayska leh anaan, diiradduu qabane
Sida doxorka lidoora anaan, duudxammaal noqone
Doofaarka eyga ah anaan, daarihiis geline
Anigaan dillaallkiyo ardiga, duubiguu xirane
Anigaan dariiqada Alliyo, diinta caasiyine
Daarood Ismaaciil ma oga, dowga loo qodiye
Waa wixii durbaan tumay markaan, dowga sii
    maraye
Waa wixii dayoy yiri intuu soo dabbaaldegaye
Dadow maqal dabuubtaan ku iri, ama dan haw
    yeelan
Ama dhaha darooryiba jiryaye, doxorku yeelkiisa
Nin ragey dardaaran u tahay, doqon ha moogaado.
Dawo lagama helo gaal haddaad, daawo dhigataane



Waa idin dagaayaa Kufriga aad u debcaysaane
Dirhankuu idiin qubahayaad, dib u go'aysaane
Marka horo dabkuu idinka dhigi, dumar
    sidiisiiye

Marka xigana daabaqadda yuu, idin dareensiine
Marka xiga dalkuu idinku oran, duunya dhaafsada e
Marka xiga dushuu idinka rari, sida dameeraaye
Mar haddaan dushii Adari iyo Iimey dacal dhaafay
Maxaad igaga digataan berruu, siin la soo degiye !

Gabaygaani kolka uu dhammaado ayaa la garaacayaa muusiko naxdin leh oo nalka la wada baqtiinayaa. Nal yar oo khafiif ah intaan la daarin ayaa Sayidka meyd ahaan go' loogu duubayaa oo dhinacyadiisa shan qori lagu kala tiirinayaa. Waxaana la maqlayaa heeskan soo socda:

        Ma ledaa dakane qabe
        Kan la diley la duudsiyey
        La yeeluhu ma daalaa

In kastoo darwiishkii
Dadabtiisu maran tahay
Uu ka tegey dugaalkii

        Doorroonayaashii
        Iyo diricyaduu dhalay
        Saw kama dambeeyaan !

Duullaan labaad iyo
Dakanadu mar bay kici
        Dibindaabyo badaniyo
        Duuflaalku naga tegi.

Ma ledaa dakana qabe
Kan la diley la duudsiyey
La yeeluhu ma daalaa ?
Marka dirirku naafaha
Daalallida habeenkii
Xilli cirirku kula dego

Gubaa di'i dix soo bixin
Uu ku darari geel dhalay
Dambarkiisa yaa dhami ?

Doob baa ku gaamuri
Qori buu degta u ridan
Ku kalaa dubbaha ridin
Saddex baa ka daba iman.

Ma ledaa dakane qabe
Kan la diley la duudsiyey
La yeeluhu ma daalaa,
Ma dhintaan darwiishyadu
Geesiyadu ma daalaan
Ma duqowdo guushuna

Dayax nuurki ma uu dhaco
Gobannimada lama dilo
Daacad lagama rayn karo.

Deeq Ilaah waxaa hela
Ninka Samir daryeelee
Mar uun bay daruuruhu
Hogool idin dul keeniye.



*Inta aan heesku dhammaan, markuu marayo beydka labaad, erayga ah«DOOB BAA KU GAAMURI» ayaa waxaa soo baxaya nin xoog weyn oo ay shaarkiisa ka muuqato calaamaddii S.Y.L. Isagoo si lixaad leh u tillaabsanaya ayuu meydka agtiisa ka qaadanayaa qori ka mid ah qoryo shan ah oo horay loo dhigay, wuuna baxayaa. Marka la gaaro erayga ah «KU KALAA DUBBAHA RIDI» waxaa soo baxaya nin lebbisan calaamadii S. N. L. isaguna qori buu qaadanayaa, wuuna baxayaa sidii kii hore. Marka la gaaro «SADDEX BAA KA DABO IMAN» waxaa soo baxaya saddex nin oo diifi ka muuqato, waxayna dul fariisanayaan meydka Sayidka meel u dhow, iyagoo qoryihii haysta, halkaasaana daaha loogu xirayaa.*

D
H
A
M
M
A
A
D

*Tilmaanta jileyaasha riwaayadda iyo dharka ay ku jilayaan.*

*QAYBTA I.*

1. *Sayid Maxamad :*
Nin aan gaabnayn, xagga dhererka xiga, lixaad leh oo gar weyn. Midabkiisu waa maarriin dhiig furan. Waa nin aamus badan, markuu hadlayana erayadiisa aad u miisaama. Markuu damco inuu qoslo wuu ilkacaddeeyaa oo keliya. Goor iyo ayaan waxaa hareerihiisa fadhiya niman Qusuusi la oran jirey oo uu ka talo qaato. Weji caraysan ayaa ka muuqda, inta badanna hoos buu u foorararaa.

DHAR : (Laga bilaabo aragga 7d) Khamiis iyo surweel ka hooseeya oo cadcad, shaayad midab leh iyo maro shanley ah oo faraqsan oo uu garbo rito. Intaas waxaa u dheer cimaamad cad oo mar walba madaxa iyo afkaba ugu duuban, kabo faygamuur ah, ul madow, tusbax iyo kitaab quraan ah oo qoortisa ka laadlaada.

2. *Dharka Qusuusida :*
Macawiso, khamiisyo cadcad, go'yaal cadcad iyo tusbaxyo midabbo kasta yeelan kara.

3. *Ciidammada Daraawiishta (dharkooda) :*
Labo go' cimaamad, tusbax, qori, shakad iyo buraashad. Kabahoodu waa faygamuur.

4. *Dharka Askarta Ingiriiska :*
Surweel gaaban iyo shaati gacmo dheere ah oo labaduba kaaki yihiin, koofi duub fiid dhuuban leh iyo kabo buud ah oo dheerdheer.

5. *Reer miyiga (Aragga 7d) :*
Labo labo go',qaarkoodna way cago cad yihiin.

*Qaybtii II*



1. *Abshir Dhoorre (Laga bilaabo aragga 9d) :*
Nin modow oo dheer oo lixaad weyn, goor walbana dhiillo ka muuqato, Sayidkana aan ka fogaan. Dharkiisu waa midka Qusuusida.

2. *Ismaaciil Mire (laga bilaabo aragga 9d) :*
Nin cas oo gaaban, asii aan aad gaabiyi uga muuqan oo qaarka sare u weyn, had iyo jeerna qorigiisa sita. Waa nin weji furfuran oo jahaadka iyo Sayidka u heellan oo fudfudud, daacadnimana ka muuqato. Dharka uu sitaana waa dharka ciidammada Daraawiishta.

3. *Xaaji Suudi :*
Nin madow oo dheer oo luqun dhuuban, asii aan lixaad qumman lahayn. Had iyo jeer, sida Abshir Dhoorre wuxuu la joogaa Sayidka. Dharka uu qabaa waa midka Qusuusida.

4. *Aw-Cilmi (Aragga 3d) :*
Oday dheer, soo godan oo gar cad, koofi iyo tusbaxna sita. Wuu indho la'yahay. Wuxuu qabaa labo go' oo cadcad, cimaamad jeexjeexan iyo kabo calfo ah.

5. *Labada wiil (aragga 3d) :*
Waa 10 ilaa 15 jirro. Waxay sitaan macawiso gaagaaban iyo shaarar cadcad, macatabyana waa u xiran yihiin.

6. *Baaderiga (aragga 3d) :*
Nin dheer oo caato ah oo dharka wadaaddada Kaatoligga ah qaba.

7. *Xaaji Muuse Igarre (aragga 5d & 8d) :*
Nin madow oo dheer oo jin yar, weydna ah. Wuxuu qabaa macawis, khamiis iyo cimaamad. Khamiiska iyo cimaamaddu way guduudan yihiin.

8. *Aw Gaas (aragga 5d & 8d) :*
Nin gaaban oo gar yar leh, dharka wadaaddada Soomalidana qaba.

9 *Qaaje-balas (aragga 12d) :*
Dheer caato ah oo dharka askarta Ingiriiska leebbisan.

10. *Diiriye (aragga 12d) :*
Nin reer miyi ah oo labo go'sita. Wuxuu kaloo sitaa ul iyo buraashad, waana cago cad yahay.

11. *Cali Faahiye (aragga-5d & 16d & 20d) :*
Nin madow, dhuuban oo gar yar leh, wuxuu xiran yahay labo go' iyo cimaamad, kitaab gal cadina qoortuu ugu jiraa.

12. *Pestaloozza (aragga 16d & 20d) :*
Nin dheer oo hilboon, shaarub yarna leh. Wuxuu qabaa surweel iyo jubbad cad oo gacmo dheer, badhammo waaweynna ku tolan yihiin.

13. *Boqor Cismaan (aragga 16d) :*
Nin madow oo lixaad leh, gar weynina ku yaal. Wuxuu qaataa macawis, khamiis madow iyo cimaamad guduudan.

14. *Xuseen-dhiqle (aragga 17d) :*
Nin cas, gaaban oo luqun dheer. Dharka uu qabaa waa dharka Qusuusida, had iyo jeerna Sayidka kama ag fogaado.

15. *Mr. Churchil (aragga 27d) :*
Nin weyn oo lixaad leh, bidaarina saabatay. Wuxuu qabaa dharka saraakiisha askarta Ingiriiska.

16. *Xubnaha Barlamaanka Ingiriiska (aragga 14d & 27d) :*
Waxay qabaan surweello iyo jubbado madmadow, intooda badanna waxaa u wehliya qoorxir (necktie), guddoonshuna wuxuu ku fadhiyaa kursi kuwa kale ka dheer oo aad u muuqda, markuu hadalka furayana wuu istaagayaa.



**Waxaa lagu daabacay**

**Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

**Xamar**